# SOOYAALKA DASTUURRADII, AXDIYADII & NIDAAMKA FEDERAALKA

**Waxaa uruuriyey, iskuna dubba-riday Qareen Zakariye I. Nuur**

## TUSMO

Tusmada……………………………………………………………………………………………………2

Gogol-dhig…………………………………………………………………………………………………3

Qeexitaanka, ahmiyadda, fahamka dastuuriyadda iyo noocyada dastuurka...5

Sooyaalladdii dastuur, axdi iyo geeddi-socodkoodii………………………………………13

Nidaamka federaalka………………………………………………………………………………

Nidaamka Garsoor ee ku haboon soomaaliya………………………………………………….57

Nidaamka awood-wadaagga…………………………………………………………………..69

Tixraacyada ………………………………………………………………………………………..80

## 1. GOGOL-DHIGGA

Wayadii hore waxaa jiray xeer iyo hida-dhaqan taxana ah oo aan qorneyn, kaas oo eey umadduhu iska dhaxlaan, ayadoo jiilba-jiilbka kale usii gudbinayay. Xeerkaasi waxa uu ku salaysnaa dhaqanka iyo hidaha suubaan ee bulshada. Waxa uu ahaay mid ummadda u horseedo nabad iyo baraare. Caddaalad-darrada, eexda iyo gabood-fallada ayaa dhinac laga wada ahaa, ciddi fal ah jaadkaas ah ku kacdana, waxaa lala tiigsan jiray xeerka uga yaal bulshada arrintaas. Waxaa xeerin jiray xeer-beegti aqoon iyo waayo aragnimo durugsan u leh xeerka iyo dhaqanka, ayagoo talo ku gooyn jiray madal lagu balamay, si cadaalad ah u garniqi jiray. kolkii bulshadii korortay, juqoraafi ahaanna dhulki u baalartay, dad-yow kala dhaqan iyo diin ahna dhismeen, loona gudbay habkaan casriga ah ee dowladnimada, waxaa qasab noqotay in la helo qaanuun qoran, hufan oo si qoto-dheer looga baaran-dagay, qodobeysan, laguna hagi karo bulshada.

Qaanuunka Dastuurigu wuxuu kamid yahay qaanuunka caamka ah, waana Axdi qodobeeysan, hagaya hab-dhaqanka bulshada labadeeda dabaqadood ee kala ah, dabaqada wax xukunto iyo tan la xukumaba.

Dastuurku waa heshiis bulsho, waxa uu ku yimaad rabitaanka iyo doonista Dadka, si ay uga tashadaan aayahooda. Dastuurku waa

heshiis u dhaxeeya dadka iyo cidda mataleeysa ee huwan awoodooda oo ah dowladda. Waa kan dhigaya aasaaska midnimadooda, hanashada awoodooda qarannimo iyo madax-banaanidooda. Waxa uu dhisayaa nidaam cadaalad ah oo qeexaya sinaanta sharciga, sareeynta awooda shacabka iyo ilaalinta xorriyadda iyo xuquuqda qofka.

Dowladda ku dhisan sharciyadda, waa tan u hogaansanta dastuurka iyo shuruucda kale ee Dalka, sida mabaadi'da sinaanta sharciga, dhowrista xuquuqda iyo xoriyyadda dadka.

Waxa ay dhigmadani ka gooban tahay gogol-dhig gaaban oo ku saabsan qeexitaanka iyo jaadadka dastuurrada oo hordhac u noqonaya qoraalka. sooyaalka dastuur sameynta Soomaaliya iyo geeddi-socodyadii iyo tub-gelinnadii ay soo martay, laga soo bilaabo1949-2012-dii, iyadoo si kooban oo taariikhaysan halkaan loogu soo bandhigayo.

Waxaa sidoo kale lagu soo bandhigayaa nidaamka garsoor ee dalka, iyadoo raadraacyo lagu sameynayo hannaanka nidaam garsoor ee dalalka federaalka, waxay ugu dambeyn lagu soo gudbinayaa nidaamka federal oo si qoto-dheer loogu faahfaahin doono nidaamka federaalka, qeybihiisa, awood-wadaagga heerarka kala duwan ee xukuumadaha iwm.

## 2. QEEXITAANKA, AHMIYADDA, FAHAMKA DASTUURIYADDA IYO NOOCYADA DASTUURKA

### 2.1. Qeexitaanka Dastuurka.

Erayga 'Dastuur' waa eray ka soo jeedo Afka Laatinka ee Roomaanka, waxaa Afkaas ka soo ergaday Afka Ingiriisiga, waxa uu leeyahay macnooyin kala duwan, waqtiyo kal geddisan loo adeegsan jiray ujeeddooyin kala ceyn ah. Waxa uu ku soo arooray macnooyin kala nuxur duwan sida xeer, degreeto wim, ilaa markii dembe uu qaatay eray " constitution" ee haatan loogu yeero.

Halka macnaha Dastuur ee Soomaaligu uu ka soo jeedo afka carabiga oo iyaguna ka soo minguuriyay Afka Faarisiga , erayada "Das" iyo "Tuur" oo macnahoodu yaay aasaaska mas'uuliyadda.

Dastuurku waa axdi/ sharci qeexaya aas-aaska mabaadi'da siyaasadeed ee Dalka, cadeeynaya hab-dhismeedka, shaqada iyo awoodaha Ha'adaha Dowladda, xiriirka ka dhaxeeya iyaga iyo kan kala dhaxeeya Muwaadiniinta.

### 2.2. Ahmiyadda Dastuurka

Dastuurku waa tilaamaame kuu dhigaya sida shaqada loo qabanaya, cidda qabaneeysa iyo **mabaadi'da** loo marayo.

Sidoo kale Dastuurku wuxuu xurmeeyaa taabbagelinta Xuquuqda, Xuriyadda asaasiga ah ee Muuwaadinka iyo Qofka.

Sida ku xusan qodobka 3aad, Faqradiisa(4): Dastuurka Ku Meel-Dastuurka Soomaaliya waxay caddeynsaysaa in Dastuurku dhiirri-

gelinayaa xuquuqda Aadanaha, talinta sharciga, shuruudaha guud ee xeerarka caalamiga ah, caddaaladda, xukuumad loo dhan yahay oo ku dhisan wadatashi, kala-soocidda awoodaha sharci-dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbanaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan iyo hufnaan ka jawaabaya danaha dadweynaha. Dastuurku waa sharciga ugu sarreeyo dalka, waa xeerka aasaasigaa, isagaa ayaa gun-dhig u ah dhammaan shuruucda kale ee dalka.

### 2.3. Fahamka Dastuuriyadda

Fahamka guud ee Dastuurnimo wuxuu ku qotamaa sharciyadda iyo xuduuda shaqada Ha'adaha kala duwan ee dowladd, si loo helo dowlad ku dhisan dastuur iyo nidaam.

Dastuurku waa in uu qeexaa kuna saleeysnaadaa arrimaha soo socda, si loo gaaro himilada la hiigsanayo:

- ✓ In uu qeexo wada shaqeeynta iyo isla xisaabtanka hufan ee Ha'adaha Dowladda.
- ✓ In uu ku saleysan yahay qiyamka dimoqraadiyadda, sarreynta sharciga, xurmaynta shuruucda caalamiga,
- ✓ in uu ilaaliyo sharciyadda Ha'adaha Dowladda, si looga hortago ku tagri fal awoodeed.
- ✓ In uu kala sooco awoodaha sharcidejinta, Fulinta iyo Garsoorka, iyada oo ay la socoto dhawris iyo ilaalin si loo xaqiijiyo **laxisaabtan** ku dhisan, ka jawaabid iyo hufnaan

- ✓ In uu sugo sinaanta iyo cadaalada guud ee bulshada.
- ✓ In uu ilaaliyo xuquuqda aassaiga ah ee muwaadinka.
- ✓ in uu dhowro, xurmeeyo Xurriyadda, Karaamada muwaadinka iyo qofka.
- ✓ In uu qeexo waajibaadka muwaadinka ee ku aadan Dalka. Sida bixinta Canshuuraha iyo daacad I noqoshada iyo horumarinta Dalka.
- ✓ In uu yagleelo nidaam dhaqan-dhaqaale, amni, caddaalad iyo maaliyadeed.

## 2.4. Noocyada Dastuurrada

Waxaa dastuurrada loo qeybiyaa guud ahaan loo qeybiyaa mid qoran iyo mid aan qornayn; dastuur la beddeli karo iyo mid ay adag tahay in si sahal ah lagu beddelo; dastuur nidaam dowlad-dhexe iyo dastuur nidaam federal.

***b) Dastuur qoran iyo Dastuur aan qornayn:***

Dastuurka qoran waa kan dhammaan qodobda iyo mabaadi'ada aasaasiga ah lagu uruuriyay hal document ama Buug, sida Dastuurka Dalkeenna.

Dastuurka aan qorneyn: waa kana ann lagu qorin hal document eek u dhisan hida-dhaqanka iyo xeerarki hore ee bulshadaas, sida Dastuurka Ingriiska.

***t) Dastuur la badali karo iyo mid aan si sahal ah lagu badali Karin.***

Dastuurka sida sahal ah lagu badali karo  waa kan ka nan u baahneeyn afti dadweyne, loona badali karo sida shuruucda kale ee dalka.

Dastuurka kakana ah ee aan si fudud lagu badali Karin waa kan u baahan afti dadweyne.

j) Dastuur Federal ah iyo mid nidaamka dowlad dhexe ah.

Waxaan qeybtaan tusaale u ah Dastuurradii Dalka ee 1960-kii, Dastuurkii 1979-kii iyo Dastuurkii 1990-kii oo ahaa kuwa nidaaminayay nidaam dowlad-dhexe.

Halka Dastuurka KMG ah ee la ansixiyay 1-dii August 2012-dii uu yahay Dastuur Federaal ah, nidaamkii dowladeed ee dalka u beddelay nidaam federal ah.

### 2.5. Dastuurka iyo Islamka

Islaamku waa Diin dhamaystiran, ku haboon waqti kasta, meel walba. Waa diin sal-adag, waxaana saldhig u ah Qura'aanka Kariimka ah iyo Sunnada Nabi Muxammad (NNKH).Waa waxyi samaawi ah, aanan aqblayn wax kabadal, wax ku darid iyo laalid toona.

Shareecada Islaamku waa mid waaqici ah, ku dhisan xaqiiqo dhab ah, xal u noqon karta mushkilad kasta oo bani aadamka lasoo daristo. Waxay leedahay shuruuc la jaanqaadi karta qarni kasta saban walba, dabooli karta baahida aadanaha, ha ahaato hagaajinta xiriirka kala dhaxeeyo Eebe Weynihii abuuray, xiriirka

ayaga ka dhaxeeyo, ha ahaado mid tacaamul, mid maamul iyo mid bulshadeedba.

Waa tan astaysay mabda'a sinaanta, wada noolaashiyaha umadaha ayagoon loo eegayn Lab iyo Dhedig, Diin, Dhalasho iyo Af toona, Madow, Cadaan ama Midab toona, waa tan bartay umadaha il-baxay in dhammaan dadku ay isku mid yihiin, in asalkoodu kasoo unkamay Aadan iyo Xaawo, in Carab iyo Cajam aaneey kala sareeyn, in sharafta iyo sareeytu ay ku qotonto Alla ka cabsi.Waa tan la dagaalantay, reebtay Adoonsiga, Faquuqa, takooridda iyo midab-takoorka iyo madiid-siga. Islamku waa kan dhowro Kaaramada aadanaha ee Eebe ku mannaystay qof kasta oo Bani'aadan ah, mamnuucay in lagu xadgudbo, waajibna uga dhigay qof walba in uu dhowro.

Wuxuu xeerkeedu qeexay talinta iyo sareeynta sharciga, sinaanta sharciga hortiisa, ayadoo kan wax xukumo iyo kan la xukuma ay u sinan yihiin cadaaladda horteeda. Waa diin ku dhisan cadaalad, fareeysa cadaalada sameeynta, halku dhiggeedu yahay: " haddii aad garsooreeysaan dadka, garsoorkiinu ha ahaado mid caadil ah, hufan, kana fogaada eexda iyo nin jeclaysiga".

Waxaan muran ka taagnayn in Diintu u tahay aqoonsi Ummad, Koox ama dad gaar ah oo bulshada kamid ah. Diintu taariikh fog ayay ku leedahay aasaaska iyo tiirarka nidaamka sharciyadeed ee bulshooyinka, maxayeelay diinta iyo bulshada waxaa ka dhexeeyo

xiriir qoto dheer oo aan marnaba laka irdhayn Karin kaas oo marwalba kaalin mugweyn ku leh hab-dhismeedka kasta ee Dastuur  oo bulsho leedahay.

Waxaa jirta siyaabo badan oo Dastuurka iyo Diintu isugu milanyihiin ama ay u wada xiriiraan, ha noqoto in Mabaadi'da guud ee dastuurka lagu sheego in dastuurku uu cuskanyahay diinta ama shareecada umaddaas rumaysantahay, sidoo kale wadamada kala duwanaashiyaha diintu ka jirto waxay dastuuradoodu sheegaan xoriyadda diinta.

Intabadan waddamada Muslimiinta ahi, marka laga reebo Xeerka Qoyska, waxeey shuruucdoodu kasoo min-guuriyeen Waddamada Reer-galbeedka, ha ahaadaan xeerarka Madaniga, Ciqaabta iwm. Sidoo kale Dastuuradoodu waxay  ayana saldhig u ah habka iyo nidaamka dastuur sameeynta ee Caalamka ka jiro, kaasoo xaqiiqdi aan la oran Karin wuxuu waafaqayaa 20% xiitaa Shareecada ama Diinta Islaamka, balse waxaa jira arrimo aalaa lagu xuso dastuuradooda, haba ku kala duwanaadaan luqadda ay adeegsanayaane, waxaa kamid ah waxyaabaha ay inta badan ka midaysanyihiin:

- in Islaamku yahay Diinta Dalka ama Qaran, sida qodobka 2 ee Dastuurka Qabyada ah ee Soomaaliya: "Islaamku waa Diinta Dawladda.Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo dalka.Lama soo saari karo sharci aan waafaqsaneyn

Mabaadi'da Guud ee Shareecada Islaamka iyo Maqaasiiddeeda".

- Mabaadi'da aasaasiga ah ama saldhigga u ah Dastuurka, sida Quranka iyo Sunnada Nabi Muxammad NNKH. Qodobka 3aad ee Dastuurka Ku -meel-Gaarka ah: "Dastuurka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur'aanka kariimka ah iyo Sunnada NabigeennaMuxammed (NNKH), wuxuuna ilaalinayaa maqaasidda (ujeeddooyinka) shareecada iyo caddaaladda bulshada.Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Islaam ah, kana mid ah ummadaha Carabta iyo Afrikaanka.
- Sarraynta Shareecada: mabda'a sareeynta Shareecadu waa mid intabadan lagu xuso Dastuurada wadamada Muslimiinta, balse lama mid ah mabda'a khilaafada ee ah in dhammaan shuruucda iyo xeerarka waddanku ay ahaadaan kuna salaysnaadaan Shareecada Islaamka, balse waa mid kaliya lagu qoro Dastuurka, dabaqaadiisuna meesha ka maqantahay. Qodobka 4aad ee Dastuurka Ku Meel-Gaarka ah, wuxuu qorayaa: "Shareecada ka sokow, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa sharciga dalka ugu sarreeya, isaga ayayna xukuumaddu u hoggaansamaysaa, wuxuuna hagayaa hal-abuurka iyogo'aannada siyaasadeed ee qaybaha Dawladda oo dhan".

- Ilaha shuruucda ama xeerdajinta waxaa saldhig u ah Shareecada Islamka, sida ay tilmaamayaa Dastuurada Masar iyo Pakistan.

## 3. SOOYAALLADII DASTUUR, AXDI IYO GEEDDI-SOCODKOODII (1949-2012)

Soomaaliya waxaa loo dhigay dastuurro iyo axdiya badan lagasoo bilaabo xilligii wasaayada, waqtigii xorriyadda la qaatay ilaa maantadaan. Waxaan ka xusi karnaa Axdigii 1949, Dastuurkii 1960, 1979, 1990, Axdigii 2000, Axdigii 2004 iyo Dastuurka Ku-meel Gaarka ee la ansixiyay 1-dii August 2012.

### *3.1. Dstuurkii 1960-kii*

Qaramada Midoobay ayaa go'aamisey 21 November 1949 in Soomaaliya la galiyo wisaayo (trusteeship) muddo 10 Sano ah. 27 Desember 1950, Qaramada Midoobay waxay u igmatay Dawladda Talyaaniga in ay ku maamusho Gobolladii Koon-fureed wisaayo ahaan (Trusteeship), maamulkaas oo loo yiqiin "Amministrazione Fiduciaria Italiana della Somala (AFIS), halka Gobolada waqooyi la go'aamiyey inay sii ahaato maxmiyada Ingriis (British Protectorate). Heshiis Wisaayadda ee Qaramada Midoobay wuxuu qeexayey mabaadi' guud ee Dastuur oo tilmaamaysay xuquuqda dadka dhulka Soomaaliyeed iyo Waajiboodka.

Isla waqtigaas ayuu bilowday geeddi-socodka dastuur samaynta Soomaaliya, waxayna waddamadii kor-joogtaynayay maxmiyaddu ay bilaabeen howsha diyaarinta qabyo qoraal Dastuurka iyagoo u xilsaaray wakiilkii Hindiya ee Qaramada Midoobay. Degreeto Lr.140 ee soo baxdey September 6 1957, ayaa lagu magacaabay labo

guddi oo kala ah guddi siyaasadeed (bale ma kulmin mana shaqeyn Guddigaas) iyo guddi farsamo oo soo diyaariyo Dastuurka Soomaaliya.

November 1958-dii ayuu Guddigii farsamadu soo bandhigay qabyo-qoraal Dastuur oo hordhac ah kana kooban 141 Qodob, ayna la socoto faallooyin gaaraya 316 bog. Xeer Lr.6 ee 8dii Janaayo 1960 ayaa awood buuxda u siisay Golihii sharci dejinta (Assemblea Legislativa) in uu la wareego howsha Dastuur samaynta. Golihii sharci dejinta waxay markii ugu horreysay kulmeen 17-kii Maarso 1960, waxayna magacaabeen guddi siyaasaddeed oo soo daraaseeyo qaby-qoraalka Dastuurka 22dii Maajo 1960. Guddiga siyaasadda wuxuu hawshiisii billaabay 29 Maarso 1960 wuxuuna dhammeeyey 9 kii Maajo 1960 asagoo yeeshay 42 fadhi muddo 31 maalmood gudahood. Baarlamaanka Soomaaliya ayaa ansixiyay 21dii Juun 1960 qabyo qoraalkii dastuurka oo ka koobnaa 104 qodob. Ansixinta Dastuurka waxay ka horreysay in ka yar labo toddobaad maalintii madax-bannaanida Soomaaliya ee 1dii Luulyo, 1960. Waxaa lagu meel-mariyay afti-dadwayne 20kii Juun 1961, waxaana HAA ugu codeeyey (90%) codadkii la tiriyay ee ay dhiibteen dadka Soomaaliyeed.

Waxaa wax ka bedel lagu sameeyay 31 December 1963.

## 3.2. Dastuurkii 1979

Awooddii dalka afgambi waxaa kula wareegay 21-dii Oktoobar 1969-kii saraakiil ka tirsan Ciidama Qalabka Sida (CQS) oo isku magacaabay Golaha Sare ee Kacaanka (GSK), waxayna CQS laaleen Dastuurkii iyo dhamaan awoodihii dawladda oo Dastuurku tilmaamey oo ay ka mid yihiin awoodihii Sharci-dejinta, garsoorka iyo fulinta. Waxaa bilowday 10 sano oo dalku dastuur la'aan ahaa laguna maamulayay digreetooyin ama amaro ciidan, waxaana loo diyaarinaayey in lagu dhaqo nidaamka hantiwadaagga. 21-kii Oktoobar 1969 waxaa la soo saaray warqaddii 1-aad ee Kacaanka oo kala qeexeysay siyaasadda arrimaha gudaha iyo arrimaha dibadda.

Xeerka Madaxweyne ee Lambarkiisu yahay 90/91 ee 20kii Oktober 1977ayaa lagu magacaabay guddi soo diyaariya mashruuc Dastuur 1977-dii, guddigaas wuxuu soo diyaariyay qabyo-qoraal Dastuur oo ka kooban 114 qodob, waxaana lagu ogolaaday Sharci Lr.16 ee soo baxay 20kii May 1979. Arrimaha ugu muhiimsan ee Dastuurkan xeeriyey waxaa ka mid ah: a) Nidaam xisbiyeed ah hal xisbi – Xisbiga Hanti-wadaagga Kacaanka Soomaaliya (XHKS); (b) Nidaamka Madaxweynuhu yahay Madaxa Dawladda iyo Madaxa Laanta Fulinta oo Golaha Shacabku dooranayo.

Sidoo kale, waxaa lagu ogolaaday Xeerka Madaxweynaha ee Lr.23

ee soo baxay 16kii Juun 1979 ee aftida Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya. Waxaana afti loo qaaday 25tii Agust 1979-kii.

Waxaa afti loo qaaday 25 August 1979(99.8%).

Waxaa qodobo ka mid ah lagu sameeyay wax ka beddel sanadkii 1984 sida ku cad Sharci L.40 ee 23/12/1984 iyo sanadkii1989 sida ku cad Sharci Lamb. 14 ee 4tii Maarso 1989.

### 3.3. Dastuurkii 1990

Disember 1989, ayadoo la qadarinayey daruufaha gaar ah ee xilligaa jiray iyo wax-kabedelka Dastuurka lagu guda jiray awgeed, waxaa la go’aamiyey in Golaha Shacabka uu xilka sii hayo si uu u soo diyaariyo dastuur cusub oo nidaamka Jumhuuriyadda loo celinayo nidaam-dawladeedka rayadka ah ee axsaabta badan, laguna beddelo Dastuurkii 1979 oo ku dhisnaa xukunka hal xisbi iyo mabda’ hantiwadaagga. Waxaa la dhisay Guddiga Diyaarinta Dastuurka oo Golaha Shacabka horkeenay qabyo qoraal dastuureed oo muddo dheer si tifaftiran uga dooday, doodahaas oo dadweynuhu si toos ah Radiyo Muqdisho loogu tebinayey. Golaha wuxuu Dastuurkaasi oo koobna 119 qodob u ansixiyey qodob-qodob ka dibna wuxuu cutubyadiisa oo iskuduuban u ansixiyey 14-kii Oktoobar 1990 laguna soo saaray Faafinta Rasmiga ah Lr. 1R.10, ayadoo afti qaadista dadweynaha dib loo dhigay goortii duruufuhu saamaxaan. Haseyeeshee dastuurkani ma dhaqangelin

ayadoo kacdoonka jabhadaha soo kordhayey awgeed iyo ayadoo bishii Jannaayo 1991 nidaamkii dawladeed ee Jumhuuriyadda Demoqraaddiga Soomaaliya ku dhisneyd oo burburay awgeed.

## 3.4. Axdiyadii KMG

### 3.4.1. Axdigii 2000

Ergadii shirkii Carta waxay ansixiyeen 26-dii Juun 2000 Axdiga KMG ee Dowladdii KMG ah ee (TNG). Axdigan wuxuu dhisay nidaam dowlad KMG, dimuquraadi ah isla markaana leh ismaamul goboleed, wuxuuna ka koobnaa 38 Qodob.

### 3.4.2. Axdigii Kmg 2004

Dhammaadkii 2002 ayaa shir dib u heshiisiin ah ka bilowday dalka Kenya. Geeddi Socodkaas waxaa lagu gaaray ansixintii Axdiga Federaalka ah iyo Dawlad Federaalka KMG ah ee (TFG). Axdiga KMG ah wuxuu farayey sameynta Guddi 15 xubnood ah oo ay howshiisu noqoneyso in uu dastuur federaal ah ku qoro labo sano iyo bar. Axdiga Federaalka KMG wuxuu ka koobnaa 71 Qodob, wuxuuna dhisay nidaam dowladeed oo federaal ah.

## 3.5. DASTUURKA KMG 2012

Geeddi-socodka Dastuur samaynta federaalka waxaa saldhig u ahaa Axdigii KMG ahaa iyo heshiiskii Jabuuti. Qodobka 68aad ee Axdiga KMG ah ee 2004 wuxuu dhigayay in dastuur federaal ah

lagu dejiyo muddo laba sano iyo bar, ka bilaabato dhisidda Guddiga Madaxbannaan ee Dastuurka Federaalka, waxaana Guddiga la dhisay Juun 2006-dii. Guddiga waxa lagu dhisay Sharciga lambarkiisu yahay RS-OP/3951-06 oo uu Baarlamaanka Federaaliga ah ee KMG ah ku ansixiyay go'aanka summadiisu tahay TFP/1/193/06. Waxa go'aankaasi lagu magcaabay 15 xubnood si waafaqsan Axdiga Federaalka ee KMG ah. Axdiga KMG federaalka iyo Sharciga lambarkiisu yahay TFP/1/193/06 waxay tilmaamayeen habka loo diyaarinaayo qabyo-qoraalka Dastuurka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyagoo qeexaya waajibaadka loo xilsaaray Guddiga iyo hay'adaha kale ee u xilsaaran ka qayb-qaadashada diyaarinta qabyo-qoraalka Dastuurka.

Iyadoo laga ambaqaadayo Heshiiskii Jabuuti ee 2009kii, tirada Guddiga waxaa lagu kordhiyay 15 xubnood waxaana la gaarsiiyay 30 xubnood, xubnaha lagu kordhiyay waxay matalayeen garabka xukuumadda wadaagga ku soo kordhay.

Bishii Maarso 2010, Guddigu wuxuu gudagaley howshiisii farsamo oo ay ku jireen doorashada guddoonka, dejinta xeer hoosaadka guddiga, bilaabidda daraasadda dastuurka, hannaanka qabyo-qoraalka dastuurka, wacyigelinta, la-tashiga dadweynaha iyo daraasado ku saabsan waaya-aragnimada shisheeye ee Dastuur sameynta, gaar ahaan habraaca latashiyada, iyo arrimaha Dastuuriga ee gaarka ah.

30-kii Luuliyo 2010 Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka Federaalka waxa uu soo saaray Qabyo-qoraalka dastuurka ee la-tashiga dadweynaha oo ka koobnaa 179 qodob, wuxuu dhisayay nidaam dowladeed oo u qeybsan Dowladaha Hoose, Dowlad Goboleed iyo Dowlad Federaal ah. Sannadkii 2011-kii, guddi cusub oo khubaro ah ayaa la sameeyay si ay u caawiyaan, dastuurkana ula dhameystiraan guddiga madaxa bannaan ee dastuurka. Labadii guddi ee dastuurka waxa ay qabyo qoraal iswaafajinaya aragtiyada kala duwan, u soo bandhigeen bishii Abriil 2012-kii lixda saxiixayaal ee hannaanka Roadmap-ka iyo Wakiilka Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey. Kulan looga hadlayay Dastuurka ayay saxiixayaashii ku qabsadeen Addis Ababa, iyaga oo aanan ku casuumin xubnaha labada guddi ee dastuurka. Guddi Farsamo oo aan xubnihiisa la shaacin ayaa la sameeyay waxa uuna dib u eegid ku sameeyay Dastuurka, waxayna saxiixeyaashii ku dhawaaqeen in ay isku afgarteen arrimihii ay isku maan-dhaafsanaayeen ee Dastuurka. Guddiga farsamo oo ku shirayay muddo laba isbuuc ah Magaalada Nairobi ayaa mar labaad dib-u-eegis ku sameeyay qaar ka mid ah qodobada dastuurka ka hor inta aanan qoraalka ugu danbeeyay loo gudbinin saxiixayaasha. 23dii Juun 2012 inta aan heshiiska lagu kala saxiixan Kenya ayay Dowladdii KMG ahayd wareegto ku kala diray Guddigii Madaxabannaanaa ee Dastuurka iyo Guddigii Khubarada ahaa. Bishii Juun 2012, saxiixeyaashii ayaa

Nairobi ku ansixiyay Dastuurka KMG iyo afar habraac oo uu ku jiro habraaca samaynta gole matalo qaranka isla markaana ansixiyo Dastuurka. Guddigii Farsamada ee Fududeynta ayaa u gudbiyay nuqul daabacan oo Dastuurka KMG ah Golahii Metelaadda Qaranka bishii Julaay 2012. Golaha oo ka koobnaa 825 ergo waxa la faray in ay u codeeyaan dastuurka iyaga oo aan waxba ka beddelin.  1-dii Agoosto 2012, Golaha Metelaadda Qaran ayaa ansixiyay Dastuurka KMG ah.

## 4. NIDAAMKA FEDERAALKA

Marka la qeexayo Federaal ee la eego macnaha guud ee uu xambaarsan yahay waxaa la dhihi karaa waa hannaan ama qaab lagu nidaamiyo siyaasadda dalka iyadoo loo qeybinayo awoodaha Dastuuriga labo heer oo kala ah heer federal iyo dowlad goboleed. Ronald L. Watts waxa uu isaguna ku qeexay macnaha federalka nidaam ay “bulsho hal dal ku nooli waxna ku wada-yeelanayaan, waxna ku kala yeelanayaan”.

Marka nidaamka federaalka laga hadlayo madax-bannaanidu (sovereignty) waxay u kala qeysban tahay dowladda dhex iyo kuwa gobollada.

Mid walba waxay madax-bannaani buuxda u leedahay awoodaha uu dastuurku siinayo (Wheare, 1964; Watts, 1996). Tusaale ahaan, haddii dastuurku siiyo waxbarashada iyo caafimaadka dowladaha gobollada, iyagaa u xor ah, dowladda dhexena waa ay uga danbaynaysaa.

Markii si kale loo dhigo, nidaamka federaalka ah waxaa uu siinayaa muwaadinka laba ama saddex dowladood oo mid waliba ay hawl dastuuri ah ku qeybsan tahay.

Waxa uu Federaalka ku yimaad qaabab kala duwan iyadoo la eegayo dhinac deegaanka, dadka iyo duruufta dal kasta, waxaana ka mid ah:

- ✓ Gobollo jiray ama dhulal la gumaysto oo isku tagey ayaa samaystay hal dal oo federaal ah (sida dalka Maraykanka).
- ✓ Dalalka gumeystayaasha ahaa ayay mararka qaar dhacdaa in ay ku khasbaan dalka ay gumaysanayaan nidaam feeraali ah, sida Boqortooyadii Ingriisku ay dalka Ostraaliya uga dhigtay federal.
- ✓ Waxaa iyaduna dhacda in waddamada dagaalka looga adkaaday qaarkood lagu khasabay nidaamka federal-ka, sida Jarmalka looga dhigay federaal kadib dagaalkii 2-aad ee dunida.
- ✓ Dal jiray oo go'aansaday in uu qaato nidamka federaalka si uu u qanciyo qaybaha kala duwan ee bulshada, sida Koofur Afrika iyo Biljam (Schuk, 2006).
- ✓ Marka dal nidaam dowlad dhexe lahaa uu u qeybsamo gobolo kadibna ay ku heshiiyaan in ay qaataan nidaamka Federaalka sida Canada 1867.
- ✓ Heshiis ay wada gaaraan dawlado kala duwan, oo danta laga leeyahay tahay in la xalliyo mushkilado jira iyo in la helo difaac mideysan.
- ✓ Waddan ay deggan yihiin qowmiyado kala duwan oo raba inay sameeystaan xukuumad qaran.

Nidaamka federaalka waa mid ka mid ah hannaanka daadejinta awoodda iyo adeegga, waxaan awooddii dowladda loo qeybinnayaa

saddex heer oo kala ah Dowlad Dhexe, Dowlad Goboleed iyo Dowladaha Hoose.

Sida ay tilmaamaan dadka aaminsan nidaamka federaalku wuxuu keenaa in gobol kasta oo xubin ka ahi uu difaac adag ka yeesho cadawga dibadda, gobol kastana waxa uu siinayaa fursad ganacsi oo balaaran iyo shaqaale badan. Muwaadiniinta dalalka federaalka ahi waxa ay helaan fursado badan oo ay siyaasadda dalka uga qayb qaataan oo ah doorashada heerarka kala duwan ee awoodaha haya. Dadka laga tirada badan yahay, haddii ay deegaan u gaara dalka u badan yihiin, feker ahaan, dhaqankooda iyo luuqaddooda ayey isku maamulaan iyaga oo aan cabsi ka qabin in ay doorriyaan ama kusoo butaacaan kuwa ka tiradabadani (Afyare 2014).

Dhanka Soomaaliya, Professor Maxamed Xaaji Mukhtaar waxa uu sheegay in Xisbigii Dastuur Mustaqbal ee Soomaaliya (HDMS) ee matalayey dadka taariikh ahaan laga sad-bursan jirey ee beelaha Digil iyo Mirifle, inuu ahaa xisbigii ugu horreeyey ee soo jeediya in la qaato nidaamka federaalka, intaanba xorriyadda la qaadan 1960-kii (Mukhtar, 1989). Soo jeedintaasi ma noqon mid la qaato maaddaama madaxda siyaasadda badankoodu ay danaynayeen hannaanka dowladda dhexe.

Tirada guud ee dowladaha xubnaha ka ah Qaramada Midoobay waxay kor u dhaaftay 200. Tiradaas waxaa nidaamka federaalka qaatary 25 dal oo kaliya. Dhanka qaaradda Afrika, waxaa federal

sheegta saddex dowladood. Golaha dalalka federaalka ah (Forum of Federations) waxay sheegteen in dalalka federaalka ah ee dunida ay ku nool yihiin in ka badan 40% dadka adduunka (Forum of Federations, n. d.). Halkaa waxaa laga garan karaa in dalalka federaalka ah ay badankoodu yihiin dalal waaweyn oo dad badan. Mid kasta oo ka mid ah saddexda waddan ee Afrikaanka ah ee federaalka ah - Nayjeeriya, Itoobiya iyo Koonfurta Africa - waxay ka mid yihiin shanta waddan ee qaaradda ugu dadka badan. Dadka Soomaaliya oo qiyaas ahaan tiradoodu ay tahay10 milyan, way ka yar yihiin tirada dadka ku nool gobollo ka mid ah Koonfur Afrika, Nayjeeriya iyo Itoobiya.

Lewis iyo Mayall waxay iyagu arkaan in nidaamka federaalku uu noqon karo meel-dhexe oo ay isugu imaan karaan kooxaha doonaya dowlad dhexe iyo kuwo doonaya in la baahiyo xukunka (Lewis & Mayal, 1995). Nidaamka noocan ah, dowlad dhexe iyo maamul goboleedyadu way iska barbar jirayaan. Lewis iyo Mayal waxay sheegeen in Isutagga Imaaraadka Carabtu uu Soomaaliya tusaale wacan u noqon karo. Maxamed Abshir Waldo oo ah qoraa ruug caddaa ah, waxa uu federaalka u arkaa daawo ku habboon in lagu xalliyo carqaladaha siyaasadeed ee Soomaaliya ka jira. Qoraal uu ka qoray dhalashadii Puntland, Waldo waxa uu tilmaamay:

Go'aanka ah in federaal la qaato waxa lagu dul dhisay saddex arrimood:

a) In nidaamka maamul goboleedyadu uu yahay midka ugu habboon marka la eego xaaladda lagu jirey ee lagu daweyn karo, loogana gudbi karo, cabsida, cadaawadda iyo kalsooni xumada ka dhashay dagaalkii sokeeye ee dhiiga lagu qubay;
b) In federaalku uu yahay xal u dhexeeya nidaamyada kala ah hannaanka maamul ee ku saleysan awood-maroorsi, xarun keliya ka go'ada iyo tan goosashada mutaxan;
c) Xukun wadaaggu wuxuu xoojinayaa, awoodna siinayaa degmooyinka iyo gobollada, isla markaana wuuu keenayaa horumar bulsho iyo dhaqaale oo isku dheelli-tiran, wax-soo saarna leh (Waldo, 2010).

## 4.1. Nidaamka Federaalka ee Soomaaliya

Nasiib darro ma cadda nuuca federaal ee ay soomalaiya qaadatay maadaama aan lagu heshiid awood qeybsigii u dhaxeeyay dowladda dhexe iyo dowlad goboleedka.

Federaalka wuxuu leeyahay dhowr nuuc marka laga eego xagga awood qeybsiga, qaab-dhismeedka xukuumadaha iyo hannaanka shaqo, waxaana ugu muhiimsan:

a) Federaalka awoodda baahsan (dual federalism) oo ah kan shaqada heerarka dowladuhu ay kala madaxbannaan yihiin, mid kastaana si gooni ah oo madaxbannaan ay u gudanayso waajibaadkeeda dastuuriga. Awoodaha labada heer ee dowladdu waa kala xadidan yihiin mid kastaa wuxuu leeyahay awood qayaxan oo u gaar ah, ha ahaado Dowladda Dhexe ama Dowlad Goboleedka ama Dowladaha Hoose;

b) Fedaraal iskaashi ah (cooperative federalism), waxay dowladda dhexe leedahay awood aad u ballaaran oo ay ku dejiso siyaasadda dalka, waxaa la xadidayaa awoodda dowlad goboleedka. Tusaale ahaan Maraykan markii ay dhacday abaartii iyo sicir bararkii 1930, dhaqaalihii waddankuna uu aad u baaba'ay waxaa awood dheeri ah la siiyay dowladda federaalka si ay ula tacaamusho dhibaatada baahsan ee dalka dhan ka jirtay. Kan dembe waajibaadka iyo awooduhu

waa isku dhafan yihiin, waxaana wadaagaya dowladda dhexe, dowlad goboleedka iyo dowladaha hoose.

## 4.2. Aasaaska Federaalaynta Soomalaiya

Qodobka 48aad ee Dastuurka KMG waxa uu qaab-dhismeedka Dowladda u qeybinayaa labo heer oo kala ah heer federal iyo heer dowlad goboleed, wuxuuna u dhigan yahay sidan.

Qaab-dhismeedka Dawladda ee Jamhuuriyadda Federaalku wuxuu ka kooban yahay 2 heer Dawladeed: (a) Heerka Xukuumaddu Federaalka (b) Heerka Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxaa ka kooban tahay Xukuumaddu ka tirsan Dawladaha Federaalka iyo Dawladaha Hoose.

Gobol goonni isu taagi karaa ma jiri karo, inta uu Gobol kale uu kuu biirayo, Xukuumaddu Federaalka Soomaaliya ayaana maamulaysa waxaana waajib ku ah gobolkaas inuu ku biiro gobol kale ama Dawlad xubin ka ah Dawladda Federaalka muddo labo sano gudahood ah.

Halka Qodobka 1aad ee DKMG ah uu dhigayo in Soomaaliya tahay Jamhuuriyad federaal ah, leh gobannimo, dimoqraaddi ah, oo ku dhisan matilaadda dadweynaha, loo dhan yahay oo ku salaysan nidaamka axsaabta badan iyo caddaalad bulshadeed.

## 4.3. Maxay Soomaaliya u qaadatay Federaalka

Doodi kama-taagna in la dhiso dowlad soomaaliyeed oo shaqeysa, loona daadejiyo awoodda iyo adeegga dowlad goboleedka iyo dowladaha hoose si soomaaliya u yeelato dowlad awood leh oo madaxbannaan dadkuna ay ku kalsoon yihiin.

Hayeeshee soomaalidu waa ay ku kala aragti duwan tahay hannaanka loo baahinayo awoodda iyo adeegga maadaama aanu jirin heshiis bulsho oo laga talo-geliyay dhammaan dadka soomaaliyeed ama ugu yaraan indheer-garadka iyo aqoon-yahanka dalka, sidoo kale Dastuurkii KMG ahaa weli waa qabyo oo waxaa ku socda dib u eegid.

Xalka wada noolaashiyaha, wadajirka iyo is-aaminaadda umaduhu kuma yimaado nidaam gaar ah oo la qaatay ee waxay ku yimaadaan is-aaminaad iyo in ay jirto dan dadka mideyso.

Soomaaliya waxay qaadatay Federaal aan ku imaan talo, aragti nadiif ah iyo doonista dadka soomaaliyeed oo idil, hase yeeshee federaalku waxa uu noqday midka keliya ee hadda shaqeeyo dowladnimada soomaaliya ku taagan tahay nuuca uu rabo ha noqdee.

Dastuurradu waxa ay nidaamiyaan danaha siyaasadeed, kuwa bulsho iyo kuwa dhaqaale ee muwaadiniinta iyo hay'adaha dowladda. Sannadkii 2012 is-jiid-jiid badan kaddib, hoggaanka dowladda federaalka iyo dowlad gobollada waxa ay ku heshiiyeen dastuur aan dhameystirneyn. Sikastaba xaalku ha noqdee, waxaa

la ansixyay Dastuurkii KMG, waxaa la dhisay dowlad goboleedyo, qaar ka mid ah dowlad goboleedyadu way ka horreeyeen Dastuurka KMG, halka qaarka kale la dhisay Dastuurka kadib.
Waxaa intaa dheer in Dastuurka KMG ah uu weli waa qabyo yahay oo aan dhamaystirnayn, dib u eegiddiisa ayaa socota oo waxaa gacanta ku haya Guddiga Madaxabannaan iyo Guddiga La socodka Baarlamaanka, waxaa kale oo jira arrimo aad muhiim u ah u baahan wada-xaajood siyaasadeed oo aan go'aan laga gaarin laf-dhabarna u ah Dastuur dhamaystiran iyo dowlad-nimo hirgasha.
Haddii ujeedku federaalku yahay daadejinta adeegga iyo awood, sidoo kale la ilaaliyo midnimada, wadajirka iyo nabad kuwada noolaashiyaha ummadda, waxaa hubaal ah in uu hiigsanayo hillin toosan. Haddiise yoolku noqdo awood raadin iyo khilaaf joogta oo aan horumar horseedeyn, waxaa hubaal in lagu hungoobi doobo.
Haddaba dhibaato kama jirto nidaamka federaalka ee waxay caqabaddu ka jirtaa fahamka dadka soomaaliyeed iyo habka iyo hannaanka loo meel-marinayo nidaamkaas.

### 4.4. Sidee nidaamka federaalku ku hirgeli karaa

Waxa uu nidaamka federaalku ku hirgeli karaa marka yoolka hoggaanka dalka ee heer federal iyo heer dowlad goboleed noqdo mid ku dhisan is-aaminaad, wadaniyad iyo is-ogol, lagana fogaado sedbursiga ku dhisan xaqdarrada iyo dowlad-nimada ku dhisan qaabka qabilaga.

Waa in hormuudka siyaasadda iyo indheer-garad iyo aqoon-maalka soomaaliyeed ay door muuqda ku yeeshaan hannaanka dowlad dhisidda iyo dastuur samaynta.

Inta aan la qaadan nidaam gaar ah oo laga soo minguuriyay dalal kale waa in la isla garto dhibaatada soomaaliya iyo gun-dhoggeeda, sidoo kale daraasad lagu sameeyo qaab-dhismeedka dadka, deegaanka, dhaqanka, sidoo kale raad-raac lagu sameeyo sooyaalka soomaalida, colaadihii dhacay, nidaamyadii dalka ka talin jiray xummaan iyo sammaan waxa la soo maray, waa in taariikhda dib loogu noqdaa oo casharro laga bartaa wixii nasoo maray si aysan markale u soo noqon, sidoo kale waa in aan lagu degdegin nidaam gaar ah ama nuuc gaar ah oo federaalka oo wiiqi karo midnimada iyo qaranimada daalka.

### 4.5. Federaal nocee ah ayaa Soomaaliya u wanaagsan

Somaalidu waa dad isku dhaqan, diin, luqad iyo isirba ah, waxay wadaagaan waxwalba, waa dad is-dhalay, isla-dhashay, xidid iyo xigaalo ah.

Nuuca federaalka eek u haboon soomaalida ma noqon karo mid laga soo min-guuriyay ummado kale oo ku qotomo dhaqanka, caqiidada iyo danta ummadaas.

Ma jiro hannaan federal oo gaar ah oo xal kama dambeysa u ah u noqon kara soomaalida, waa dhici kartaa in casharo iyo duruus laga

qaato umadaha nala midka ah ee aan wadaagno burburka iyo colaadaha ee kasoo kabtay ama haatan ka soo kabanaya.

Nooca federal ee ku haboon soomaaliya waa in uu noqdaa mid u gaar ah soomaalida, ka turjumaya duruufahooda amni, dhaqan-dhaqaale, bulsho, aayo-ka-telin iyo jiritaan.

Ha ahaatee waxaa haboon in mabda'a ahaan saldhig iyo bud-dhig arrimaha soo socda:

1) In la helo nidaam ilaalinaya midnimada iyo madaxbannaanida gayyiga soomaaliya.
2) In la baahoyo adeegga aasaasiga u ah bulshada qeybaheeda kala duwan.
3) In awoodaha qaarkood loo daadejiyo dowlad goboleedka iyo dowladaha hoose.
4) Awood wadaag la isku raacay, kuna qotoma hannaanka ugu habboon ee lagu ilaalin karo midnimada, dowladnimada, wada-noolaashiyaha bulshada, is-aaminaadda iyo wax-wada-qabsigooda.
5) In laga heshiiyo qaab-dhismeeda dowladda (fulinta, xeer-dejinta iyo garsoorka), nidaamka maaliyadda, difaaca, amniga, dhaqaale iyo kheyraad qeybsiga iyo habka canshuur uruurinta.

6) In cilmi-baaris iyo daraasado lagu sameeyo sooyaalka soomaalida ee amni, dhaqan-dhaqaale, colaadeed, dowlad la'aan iyo khilaaf ee uu soo maray dalku.
7) In qaab-dhismeedka dowladda uu noqdo saddex heer oo kala ah heer dowlad dhexe, heer dowlad goboleed iyo heer dowladaha hoose si loo xoojiyo nidaamka baahinta awoodda iyo adeegga.
8) In dalka loo dhigo Dastuur ay dadku raali ku wada yihiin, si loo helo midnimo, wada-noolaashiyo, wada-shaqeyn, hufnaan, dowlad wanaag, iskaashi, kalsooni, isku-xirnaasho, nabad kuwada noolaashiyo shacabka.
9) in daraasado lagu sameeyo arrimaha ay ka mid ka yihiin qaab-shismeedka dowladda, awood wadaagga, hannaanka garsoorka, hannaanka amniga, maaliyadda, kheyraad wadaagga, doorashooyinka iyo jinsiyadaha, guddiyada iyo xafiisyada madaxabannaan.

## 4.2. Qaab-dhismeedka Dowladda Federaalka

Nidaamka dowladeed ee dalka waxaa asteeya isla markaana qeexa Dastuurka Dalka, ha ahaado nidaamkaasi mid Baarlamaani ah, ama Madaxtooyada ama nidaamka isku dhafka ah.

Nidaamka ku haboon dalka waa in si qeexan loo sheegaa Dastuurka, haddii kale waxaa imaanaya in lagu jahawareero qaab-

shaqeedka dowladda, si taas looga fogaado waa in la ilaaliyo mabaadi' ay ka mid yihiin:

- ✓ Ka qeyb gelin iyo matalaad dadweyne.
- ✓ Siyaasad loo dhan yahay – wadar-ogol.
- ✓ Isla -xisaabtan iyo is –hubin.\
- ✓ Is-aqbalaad iyo dib-u heshiisiin

Qeexidda awoodda hay'ad kasta oo ka mid hay'adaha dowladda waxay door mugle ka cayaartaa dimuqaraadiyadda, isla-xisaabtanka, wada-shaqeynta iyo ishubinta ka dhaxaysa hay'adaha dowladda.

Dastuurka KMG ah si faah-faahsan uma qeexin awoodaha hay'adaha dowladda, taasina waxay sababtay in uu jiro markasta is-qabsi awoodeed oo ka dhax-dhaca hay'adahaas ama xubnaha hay'adda dhexdeeda, waxaa intaas dheer in aysan jirin Maxkamaddii Dastuurka ee awoodda u lahayn fasiraadda qodobada Dastuurka.

Doodda ku saabsan khilaafka is-qabqabsiga hay'adaha iyo xubnaha dowladda ka dhaxeeyaa waa mid soo jireen ah, horeyna ay uga doodeen sharciyaqaannada iyo aqoon-yahannada soomaaliyeed, waxaa markii ugu horreysay looga dooday shirkii Carta ee Jabuuti. Guddigii soo diyaariyay Axiga KMG waxay soo bandhigeen in loogu noqdo arrimaha isqabsiga xubnaha dowladda gaar ahaan

Madaxweynaha iyo Ra'isul Wasaaraha Dastuurkii 1960, maadaama uu si qeexan u kala saarayo awoodaha xubnahaas.

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-Eegidda iyo Hirgelinta Dastuurka iyo Guddii La Socodka ee Baarlamaankii 9aad waxay soo diyaariyeen sagaal(9) Xulasho oo ay ku lafa-gurayaan qaab-dhismeedka dowladeed eek u haboon soomaaliya.

### Xulashada 1aad ee Qaab-dhismeedka Dowladda

Marka laga hadlayo awoodaha hay'adaha dowladda, wada-shaqeynta ka dhaxaysa waxaa lagama maarmaan ah in maanka lagu hayo isla-xisaabtan iyo is-hubin, taasoo noqonayso in xeer-dejintu la xisaabtanto fulinta, mararka qaarna ayba shaqada ka joojin karto, halka fulinta gaar ahaan madaxweynuhu uu kala diri karo, halka garsoorku xaddidi karo hab-dhaqanka fulinta iyo xeer-dejinta ama uu laali karo xeer kasta ama go'aan kasta oo ka soo baxa.

Waxaa arrintaas ka hadlaya Cutubyada 6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad ee Dastuurka KMG.

Xulashada 1aad waxay soo bandhigaysaa qaab-dhismeedka xeer-dejinta, nidaamka fulinta iyo hannaanka caddaaladda ee ku haboon dalka, waxaa sidoo kale jiraya xulashooyin kale oo ka duwan tan koowaad nuxur ahaan iyo murti ahaanba.

**a) Baarlamaan Federaal ah oo ka kooban Hal Gole**

Waxay xulashadaani soo bandhigaysaa in la laalo aqalka sare, Baarlamaankuna uu ahaado hal gole oo keliya oo matala muwaadiniinta iyo dowlad goboleedyada.

Waxaa aragtidaan saldhig u ah arrimo is-biirsaday oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

- In dhaqaale ahaan aysan dowladda soomaaliya qaadi-karin awoodna u lahayn Baarlamaanka ka kooban labo aqal.
- In la ilaaliyo sooyaal sharci-dejinta ee dalku lahaan jiray, laga soo bilaabo waqtigii xurriyadda ilaa maantadaan.
- Si looga baaqsado isku-dhaca iyo khilaaf ka dhax abuurmi-kara labada aqal ee Baarlamaanka ee xagga xeer-dejinta iyo isla-xisaabtanka.
- In la helo hannaan matalaad iyo habraac xeer-dejin fudud.
- Waxaa meesha ka baxay khatartii dib u dhaca xeer samaynta.
- Waxaa fududaanaya isla xisaabtanka maadaama aysan jirayn isku halleyn ka ka jirta xeer-dejinta.
- Culays ayuu abuurayaa aqalka sare marka la eego maamullada ay matalayaan iyo habka iyo hannaanka ay ku imaanayaan.
- Waxaa jira khilaaf ku salaynsan sedbursi iyo loollan qabiil oo u dhaxeeya qabii'ilka waaweyn oo ku saabsan tirada, habka

iyo hannaanka lagu dooranayo ama ay ku imaanayaan xubnaha aqalka sare.

- Xubnaha aqalka sare waxay matalayaan dowlad goboleedyada ay qabaa'ilka waaweyni ku xooggan yihiin, halkii ay ahayd in uu matalo qabaa'ilka laga tirada badan yahay si loo ilaaliyo midnimada iyo wadajirka ummadda soomaaliyeed.

***Waxaa jira dhaliilo ay leedaha xulashadaan oo ay ka mid yihiin:***

- ✓ In matalaaddii dowlad goboleedyada ay meesha ka baxayso, maadaama aqalka sare uu matalo danta iyo maslaxadda dowlad goboleedka.
- ✓ Waxaa abuurmaya kali-talisnimo iyo kutakrifal awoodeed, maadaama awooddii xeer-dejinta uu la wareegay hal aqal oo aanu jirin aqal kale oo hubin iyo daba-gal ku leh xeerarka uu soo saaro.

Marka laga soo tago faa'iidada iyo faa'iida darrada ay leedahay aragtida ama xulashada 1aad, waxaa jira caqabado dhab ah oo uu yeelan karo aqalka sare ee baarlamaanka.

1. Taariikh ahaan Baarlamaannadii soomaaliya-laga soo bilaabo 1960kii ilaa 2012 ma yeelan labo aqal waan arrin ugub ku ah siyaasadda Soomaaliya.

2. Hannaankii iyo habkii ay ku dhismeen Goblladdii Soomaaliya ee tiradoodu ahayd 18ka Gobol oo aanay ku qanacsanayn isla markaana aaminsan yihiin dad badani in ay ahaayeen kuwa ku dhisan sedbursi iyo caddaalad darro.
3. Qodobka 72aad ee Dastuurka oo isaguna dab ku sii shidaya loolanka iyo tartanka qabiilka ee ka jira soomaaliya, maadaama saldhig looga dhigay xubnaha aqalka sare 18kii gobol ee ka jiray dalka wixii ka horreeyay 1991-dii, haddana isla qodobkaasii wuxuu dhigayaa in si isla eg loogu qeybinayo xunbaha aqalka sare dowlad goboleedyada.
4. Beelaha oo isku khilaafsan tirada loo qoondeeyay gobollada oo xiitaa khilaafsan tii uu dhigayay qodobka 72aad ee Dastuurka, maadaama Soomaalidu wax ku qeybsanaysay 20kii sano u dambeysay nidaamka 4.5-ka.
5. Deegaannada qaar oo qaba in aqalka sare lagu saleeyo qaab qabiil si la mid ah golaha Guurtida ee Soomaaliland, maadaama khilaaf iyo is-qabqabsiga Soomaalidu uu ku qotomo qabiil.
6. Waxay dhibaato ka imaanysaa matalaadda qabiillada yaryar ee aqalka sare, maadaama xubnaha aqalka laga soo dooranayo dowlad goboleedyada ayna ku loolamayaan qabaa’il waaweyn.

**b) Nidaamka Fulinta oo uu hogaaminayo Madaxweyne ay soo doortaan golaha shacabka**

Waxay xulashadaani soo bandhigaysaa in uu jirayo Madaxweyne noqonayaa madaxa dowladda iyo madaxa xukuumadda, waxayna soo-jeedinaysaa in la baabi'iyo Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

Baarlamaanka ayaa soo dooranaya Madaxweynaha, halka Madaxweynuhu uu soo magacabaayo xukuumadda ama golaha wasiirrada isla markaana uu noqonayo madaxa xukuumadda. Baarlamaanku waxay xukuumadda siinayaan codka kalsoonida.

Nidaamkan wuxuu siinayaa madaxweynaha awood fulineed, sidoo kale awoodda xeer-dejinta iyo fulinta way kala madaxbannaan-yihiin.

Waxaa madaxweynaha xilka looga qaadi karaa oo keliya marka uu gelo fal dembiyeedka khiyaamo qaran ama uu ku xadgudbo Dastuurka iyo Shuruucda Dalka

Sababaha loo doorbiday xulashadaan ayaa ah in:

1) La yareeyo khilaafka iyo loollanka u dhaxeeya xeer-dejinta iyo fulinta ee ku saabsan hannaan magacaabidda iyo xil ka qaadidda.
2) Xasilooni siyaasadeed ay ka jirayso dalka, maadaama aan ognahay in tan 2000 la magacaabay 12 Ra'isul Wasaare oo ay sababeen khilaafka madaxda sare ee dalka.

3) La helo hogaan siyadeed oo qeexan iyo mas'uuliyad dhab ah oo uu yeesho Madaxweynaha, isagana lagula xisaabtamo.
4) La helo xukuumad si dhab u shaqeyso oo khilaaf la'aan ah, maadaama ay dhaqan noqotay in xukuumad kasta la rido ama aysan shaqeyn wax ka badan 2 sano ama bilo.
5) Ay jirto aragtida sharcinimada dimuqoraadiyada dadban ee dhanka fulinta iyadoo Baarlamaanku uu yeelanayo la xisaabtanka xukuumadda, maadaama ay iyagu dooranayaan madaxweynaha sidoo kale ay codka kalsoonida siinayaan xukuumadda.

Waxaa jira dal-daloolo ama faa'iida darro ay leedahay xulashadaan laguna dhaliili karo, waxaana ka mid ah:

a) Dhammaan awooddii fulinta waxay ku uruursan tahay laanta fulinta, waxayna taasi horseedi kartaa keli-talisnimo;
b) Awoodaha lagu uruuriyay dowladda dhexe waxay abuuri kartaa is-aaminaad darro iyo colaada sokeeye, waana in cashar laga bartaa dowladdii kacaanka iyo sababaha burburkii dowladnimo iyo dagaalka sokeeye kiciyay;
c) Haddii awoodda dhan la siiyo madaxweynaha waxay dalka ku hogaamin kartaa xukun kale oo keli talis ah;
d) Waxay dhiiri-gelinaysaa aragtida soomaalida ee ku salaysan raadinta jagada Madaxweynaha ee ay u arkaan tan ugu sarreysa dalka.

**c) Nidaamka Maxkamadaha Mideysan**

Waxay xulashadaani soo jeedinaysaa in nidaamka garsoorku uu noqdo mid mideysan, loona daayo sidii uu ahaan jiray.

Waxaa jiraya Gole Sare ee Garsoor uu nidaaminaya hannaanka maamulka, magacaabidda, dallacsiinta, xilka ka qaadidda, eryidda iyo kala beddelidda garsooreyaasha, xeer ilaaliyeyaasha iyo shammaan shaqaalaha garsoorka.

Waxaa sidoo kale jiraya hal nidaam garsoor oo uu dalku yeelanayo.

Qaab-dhismeedka Maxkamadaha waxay noqonayaa Maxkamadda Dastuurka, Maxkamadda Sare ee Federaalka; Maxkamadaha Racfaanka oo noqonayaa kuwa ugu sarreeya dowlad gobobleedka iyo Maxkamadaha Degmooyinka iyo Gobollada oo noqonaya Maxkamadaha darajada 1aad.

Waxay garsooreyaashu qaadayaan dacwadaha federaalka iyo kuwa dowlad goboleedka sidoo kale xeerarka federaalka iyo kuwa dolad goboleedka.

## Xulashada 2aad ee Qaab-dhismeedka Dowladda

Xulashada 2aad waxaa dhigaysaa in uu jirayo Barlamaan Federal oo laba Gole leh oo noqanaya Golaha Shacabka iyo Golaha Odayada, Madaxweyne ah Madaxa Dawladda iyo Ra’iisul-wasaare uu

Barlamaanka soo doorto ahna Madaxa Xukuumadda iyo Nidaam Garsoor oo isku-dhaf ah.

Xulshadaan waa midda nidaamka isku dhafka ah ee dowladda waxaa loo doortay in la raaco nidaam u dhow qaab-dhismeedka uu tilmaamayo Dastuurka KMG ah.

Waxaa loo arkay xulashadaan in ay tahay midda ugu macquulsan marka waayaha siyaasadeed iyo duruurafaha ku gadaaman dhaqanka siyaasadda soomaaliya, awood qeybsiga qabaa'ilka iyo cabsida kelitalisnimada, hase yeeshee ma'ahan nidaamka ugu habboon.

**a) Baarlamaan Federaal ah oo ka kooban Labo Gole: Golaha Shacabka iyo Golaha Odayada**

Waxay xulashadaani soo jeedinaysaa in golaha shacabka ee uu dhigayo Dastuurka KMG sidiisa loo daayo, halka aqalka sare lagu beddelayo golaha odayada oo matalaya dowlad goboleedyada.

Waxaa golaha odayada si toos ah u soo dooranaya golaha wakiillada dowlad goboleedyada, dowlad gobleed kastana waxaa loo qoondeeyay 10 xubnood sidaasna waxay ku noqonayaan tiro isla eg in la siiyo dowlad goboleedyada.

Waxay xulashadaani soo-jeedinaysaa in curinta iyo bilaabidda shuruucda ay ka timaado golaha shacabka oo keliya, sidoo kale in golaha shacabku uu baal mari-karo go'aannada golaha odayada

ansixiyo haddii golaha shacab uu go'aankaas ku diido codka saddex meelood labo (2/3) ee tirada xubnihiisa.

Ujeeddada ugu weyn ee soo-jeedintaani waxay tahay in laga fogaado khilaaf iyo mari-waa ka dhax-dhasha labada gole ee baarlamaanka marka la soo saarayo sharci.

Hannaankani wuxuu dhigayaa in la wiiqo awoodda labada gole midkood gaar ahaan golaha matala dowlad goboleedyada.

**b) Nidaamka Baarlamaaniga**

Waxay xulashadaani soo jeedinaysaa in awoodda fulinta ay ka imaanayso xeer-dejinta maadaama Ra'isul Wasaarahu ka imaanayo golaha shacabka isla-markaana uu yahay madaxa xukuumadda iyo hogaamiyaha golaha wasiirrada, halka uu kalsooni uga baahan-yahay golaha shacabka oo isaga iyo xukuumaddiisa siinaya codka kalsoonida.

Halka Madaxweynihu uu noqonaya madax sharafeed aan lahayn wax awood fulineed ah xilkiisa ugu muhiimsan uu noqonayo hab-muumuus.

Madaxweynaha waxaa soo dooranayo xilkana ka qaadayo Labada Gole ee Baarlamaanka, halka Ra'isul Wasaaraha ay soo dooranayaan xubnaha golaha shacabka isla-markaana ay la xisaab-tamayaan.

Madaxweynaha waa madaxa dalka wuxuuna matalaa qaranka soomaaliya, halka

Ra'iisul-wasaarahu yahay madaxa Golaha Wasiirrada islamarkaana uu qabanayo hawlaha Xukuumadda.

Yoolka xulashadaani wuxuu yahay in la xeeriyo arrimaha soo socda:

- ✓ In la xaddido wax ka beddelka Dastuurka KMG ee hadda jira, lana qaato hannaanka ugu dhow qaabka ahaan Dastuurkan.
- ✓ In la xoojiyo hannaanka isla-xisaabtanka ee golaha shacabka maadaama ay kalsoonida kala noqon karaan xukuumadda.
- ✓ In xisbiga guuleystay uu soo dhiso dowladda ama isbahaysiga xisbiyadu ay soo dhisaan dowlad ay wadaag ku yihiin.
- ✓ Hannaanka magacaabidda iyo xeer-dejinta oo aad u sahlanaanaya maadaama xukuumaddu ka imaanayso golaha shacabka.

Dhaliilaha ay leedahay xulashadaani waxaa ka mid ah in aan madaxa dowladda iyo xukuumadda aan si toos ah loo soo dooranayn iyo in haddii xisbi waayo aqlabiyadda kuraasta golaha uu imaan karo khilaaf ragaadiya shaqada golaha shacabka.

**c) Nidaam Maxkamada isku-dhaf ah**

Xulashadani waxay soo bandhigaysaa in la dhiso nidaamka garsoor oo isku-dhaf ah taas oo ay jirayaa Maxkamadda Dastuurka iyo Maxkamadda Sare ee Federaalka oo ay maamulayso masu'uulna ka

tahay dowladda Federaalka, sidoo kale waxaa jiraya golaha adeegga garsoorka oo maamulaya garsoorka federaalka.

Halka ay jirayaan Maxkamadaha Racfaanka iyo Maxkamadaha darajada hoose oo gelaya dhammaan dacwadaha labada heer oo ay maamulayaan dowlad goboleedyada, sidoo kale waxaa jiraya guddi adeeg garsoor oo ay yeelanayso dowlad goboleed kastaa.

Waxaa loo qaatay xulashadaan in la dhiso hal nidaam garsoor oo dalka oo dhan ka hirgala, sidoo kale nidaaminaya qaab-shaqeed Maxkamadaha kala duwan ee labada heer.

## Xulashada 3aad Qaab-Dhismeedka Dowladda

Waxay xulashadaani dhigaysaa in uu jirayo Baarlamaan Federaal ah oo ka kooban labo gole oo kala ah golaha shacabka iyo golaha ergada dowlad goboleedyada, Madaxweyne ah Madaxa dowladda iyo madaxa xukuumadda oo ay shacabku si toos ah u soo dooranayaan, wax isla xisaab tan ah aanay ku lahayn Baarlamaanka iyo Nidaamka Maxkamadaha isbar-bar socda ama nidaamka garsoorka baahsan.

**a) Baarlamaan ka kooban labo gole: golaha shacabka iyo ergada dowlad goboleedka.**

Xulashadan waxay soojeedineysaa in la dhiso Barlamaan Federal ah oo ka kooban labo Gole leh balse Golaha labaad uu noqdo mid la dhisayo marka loo baahdo oo kaliya isagoo noqonaya Golaha Ergada Dawlad Goboleedyada.

Golahaan Ergadu wuxuu hawl bilaabayaa marka ay soo baxdo baahi dhab ah taas oo ah xilkooda dastuureed (tusaale marka Dastuurka wax laga beddelayo, xil-ka-qaadista Madaxweynaha, ku-dhawaaqid xaalad dagaal ama xaalad degdeg ah, ama magacaabista garsoorayaasha ama Guddiyada Madaxabannaan), ha ahaatee wax door ah kuma lahan habraaca xeer samaynta.

Waxaa soo jeedinaya magacaabidda fadhi kasta ee golaha shacabka xubnaha ergada dowlad goboleedka xukuumadda dowlad

goboleedka halka ay ansixinayaan wakiilada dowald goboleedyada ay matalayaan, waxaana la soo magacaabayaa fadhi kasta

Waxaa fadhi kasta ergooyinka soo magacaabaya madaxa fulinta waxaana ansixinaya Golaha Sharci-dejinta Dawlad Goboleedyada ay wakiilka ka yihiin.

Ujeedku wuxuu yahay in la helo habraac xeer-dejin fudud oo ay dowlad goboleedyadu ku ilaashan karaa danahaooda iyo masaalixda dowlad goboleedka ee khuseysa sharciga la ansixinayo.

**b) Nidaamka Madaxtooyada**

Waxaa jiraya madaxweyne ay shacabku si toos u soo dooranayaa isla-mar-ahaantaana noqonayo madaxa dalka, dowladda iyo xukuumadda.

Waxaana si toos ula xisaabtamayo shacabka maadaama uu matalo shacabka kuma yimid rabitaankooda.

Waxaa Xulashadan lagu soojeedinayaa in Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa oo wadajira ay shacbku si toos ah ugu soo dooranayaan boqlkiiba konton hal dheeri (50%+1) iyo ugu yaraan boqlkiiba 25% codbixiyaasha diinwaan-geshan ee aqlabiyadda tirada Dawlad Goboleedyada ee wareegga 1aad, ama aqlabiyadd fudud wareegga 2aad, iyadoo labada murashax ee hela codadka ugu badan loo samaynayo doorasho laysku reebayo.

Madaxweynaha waxaa xilka looga qaadi karaa oo kaliya habraac ay ka qaybgalayso Maxkamadda Dastuurka iyo aqlabiyad seddex

meelod labo (2/3) ee xubnaha labada Gole ee Barlamaanka Federaalka.

Madaxweynuhu wuxuu matalaa dalka isagoo Madaxa Dawladda iyo Madaxa Xukuumadda. Tusaale, Madaxweynuhu wuxuu guddoomiyaa Golaha Wasiirrada wuxuuna magacaabaa xilkana ka qaadaa xubnaha Golaha Dawladda sida uu doono. Arrinta kale ee ku xusan Xulashadan ayaa ah in Barlamaanku uusan la xisaabtamayn Golaha Wasiirada ee uu Madaxweynaha soo magacaabay uu la-xisaabtamaya. Ujeeddada ugu weyn ee Xulashadan ayaa ah in la xalliyo xiriirka awoodaha isku-dhafan ee labada madax ee laanta fulinta.

c) **Nidaam Garsoor Baahsan(dula system)**

Xulashadan waxay soo jeedineysaa dhisidda labo nidamm garsoor oo isbar-bar-socda oo maxkmamadaha Federaalku ay galayaan shuruucda Federaalka oo keliya, halka maxkamadaha Dawlad Goboleedyada ay galaya shuruucda Dawlad Goboleedyada oo keliya.

Xukuumadda Federaalku waxay masuul ka tahay dhisidda iyo maamulidda maxkamadaha federaalka, halka Dawlad goboleedyada ay ka masuul ka yihiin dhisidda iyo maamulka maxkamadaha dawlad Goboleedyada oo keliya. Golaha Sare ee Garsoorka wuxuu talo la xiriirta maamulka maxkamadaha siinayaa Xukuumadda Federaalka oo keliya, halka Dawlad Goboleed kastaa uu uyeelanayo

gole adeeg garsoor u gaar ah oo kalataliya maamulka maxkamadahooda.

Sida ay Xulashadan qabto waxaa jiraya Maxkamadda Dastuurka, Maxkamadda Sare ee Federaalka , Maxkamadaha Sare ee Dawlad Goboleedyada, maxkamadaha rafcaanka ee Federaalka, maxkamadaha Rafcaanka ee Dawlad Goboleedyada, Maxkamadaha Gobollada ee Federaalka, Maxkamadaha Gobolka ee Dawlad Goboleedyada, Maxkamadaha Degmooyinka ee Federaalka iyo Maxkamadaha Degmooyinka ee Dawlad Goboleedyada.

Ujeeddada weyn ee Xulashadan ayaa ah in la siiyo madaxbannaani buuxda dawlad goboleedyada si ay u horumariyaan una maamushaan nidaamkooda garsoor.

Natiijada ka imaan karta Xulashadan ayaa ah in dalka oo dhan uu yeesho nidaamyo maxkamadeed oo labo-labo ah marka laga fiiriyo dhinaca degmooyinka, gobollada iyo heerka dawlad goboleedyada sidaa darteed waxaa badanaya tirada maxkamadaha, garsoorayaasha iyo shaqaalahooda.

### 4.2. Falsafadda Baarlamaanka Labada Aqalka

Baarlamaannada wadamadu waxay qaarkood ka kooban-yihiin labo aqal oo kala ah Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare.

Aqalka sare waa mid kamid ah labada gole ee uu ka kooban-yahay Baarlamaanka, halka kan kale uu yahay Golaha Shacabka.

Waaxaa jira magacyo kala duwan uu leeyahay aqalka sare. Aqalkaasi waxa uu ku yimaad hannaan magacaabis ama doorasho, waana mid aad yar tira ahaan iyo awood ahaan marka la eego golaha shacabka oo ah aqalka hoose, awooddiisuna waa mid xadidan.

Wadamada Leh Aqalka Sare waxaa ka mid ah Austiria Senate; Brazil's senado federal; Germany's Bundesrat; Indian's Rajya Sabha; Malaysi'a's Dewan Negara; Pakistan's senate of Pakistan; Russia's Federation Council; Swezerland's Council of State; Untited States Senate; South African's N ational Council of Provinces iwm.

Wadamada Federaalka eel eh aqalka sare waxa ka mid ah:Argentina, Australia, Austria, Belgium, Bosnia and Herzegovina, Brazil, Canada, Ethiopia, Germany, India, Malaysia, Mexico, Nepal, Nigeria, Pakistan, Russia, Somalia, Sudan, Switzerland iyo United States.

### 4.2.1. Awoodda Aqalka Sare iyo Nidaamka Baarlamaaniga

Aqalka Sare waxa uu leeyahay awoodaha xadidan, waana ka duwan yahay awood ahaan aqalka hoose, waxayna ku xiran-tahay hadba nidaamka dowladeed ee la aqaato haddii uu yahay Baarlamaani iyo haddii uu yahay Nidaamka Madaxweynaha.

Kolka la qaato nidaamka baarlamaaniga, waxa uu yeelanayaa awoodaha soo socda:

a) Waxa uu u codeeyaa oo keliya xeerar xadida iy arrimo gaar ah, sida wax ka bedelka Dastuurka.
b) Ma curin karyo inta badan xeerar, gaar ahaan kuwa la xiriiro miisaaniyadda ama lacagaha.
c) Ma lahan awood codka kalsooni siinta dowladda ama kalsooni kala noqoshada.
d) Awoodda aqalka sare waxay ku kooban-tahay nidaamka la talin iyo dib u eegis, sidaas ayaa loo xadididay loona koobay awooddiisa, waxaana meesha laga saaray oo uusan lahayn awoodaha soo socdo:
    - Wax kor-joogtayn ama la xisaabtan ah kuma lahan laanta fulinta.
    - Malahan awoodda qayaxan ee soo bandhigidda iyo ansixinta sharciyadeed.
    - Waxa uuna lahayn gabi ahaan ama la xididay curinta hindise sharciyeedyada.
    - Ma diidi karo is-hirtaagna kuma samayn karo miisaaniyadda

### 4.2.2. Aqalka Sare iyo nidaamka madaxtooyada

a) Waxa uu yeelan karaa awood u dhiganta ama u dhow tan awalka hoose;

b) Waxa uu yeelan karaa awoodo gaar ah oo uusan lahayn aqalka, sida in uu talo ama ansixin ku yeesha qaar kamid ah go'aamada flaanta fulinta, sida magacaabista garsooreyaasha iyo safiirada;

c) Waxa laga yaabaa in uu yeesho awood keliya ee arrimaha xil ka qaadista Saraakiisha Fulinta ama garsooreyaasha;

d) Waxaa dhici kartaa in uu yeesho keliya ansixinta ama diidmada heshiisyada caalamiga ah.

e) Nidaamkan waxay yeelan karaan ansixinta golaha wasiirada, xafiisyada madaxabannaan.

### 4.2.3. Tilmaamaha gaarka ah ee xubnaha aqalka sare

- Waddamada caalamku waa ay ku kala duwan-yihiin magacaabista xubnaha aqalka sare, qaar kamid ah waxay ku imaanayaan codka shacabka, magacaabis, dowlad goboleedyada oo soo magacaabo; qaab-dhaxaleed, xafiis ahaan.
- Doorashadoodu waa mid ka gedisan tan aqalka hoose.
- Waxay ka imaanayaan dhammaan Maamul Goboleedyada –haddii dalku federal yahay-, sidoo kale Maamullada kale

ee aan dowlad Goboleedyaha ku jirin ee sida tooska ah u hoos-tago federaalka, waxaana loo siinay hannaan ay ka muuqato matalaad dhamaystiran.

- Muddada xil-heyntoodu way ka dheertahay kan aqalka hoose, waxaaba dhici karto ilaa uu qofku ka dhimanayo.
- Waxaa dhici kartaa in doorashoodu ay noqoto mid 3 sano ama labadii sanaba ay qaar baxayaan kuwa cusubna la dooranayo.
- Wadamada qaar aqalka hoose lama kala diri karo ama waxaa la kala diri karaa xaalada gaar ah.
- Xubnihiisu waa ay kooban-yihiin.
- Badanaa xubnihiisu da'a ahaan aad ayay u weynyihiin marka loo eego da'da xubnaha aqalka hoose.

### 4.2.4. <u>Bundestratka Jarmalka (Federal Council)</u>

Waa gole sharci dejin matala 16-ka dowlad Goboleed ee Jarmalka, waxa uu ka qeyb qaataa hannaan sharci dejin ee Dalka si lamid ah Aqalka Hoose (Bundestag). Waxa uuna ka qeyb-qaataa so saarista sharci kasta ee saamaynaya Dowladaha Xubinta ka ah Federaalka Jarmalka iyo wax ka bedelka Dastuurka ee u baahan-wada tashiga iyo wada-xaajoodka.

Waxa uu uga duwan-yahay aqalkaan kuwa wadamada kale, maadaama xubnihiisa aan lagu dooran doorasho toos ah oo

shacabkaa ama  ansixin iyo magacaabis Baarlamaanada Dowladaha xubinta federaalka Jarmalka, hase yeeshee waa wakiilo ay soo magcowdaan hay’adaha fulinta dowlad goboleedyadu, ayna u yeertaan marki ay doonaan, mana lahan mandate firii ah, waxay shaqadoodu tahay oo keliya in ay maltalaan dowlad goboleedyadooda, mana jiro waxti go’an oo xil-hayn ah, hase yeeshee waxaa jira cusboonaysiin, waxay ku xiran-tahay hadba isbedelka siyaasadeed eek u dhaco maamulka dowladdaas.

Dowlad Goboleed kasta waxa uu u dirsanayaa xubnihiisa si waafaqsan Codka uu leeyahay statekiisu. Dowlad goboleed kasta waxay leedahay ugu yaraan sadex cod, sidaasma waxay ku yeelanaysaa sadex xubnood; Dowlad Goboleedki shacabkeedu uu ka badan yahay Labo Milyan, waxay leedahay afar cod; tii lix milyan ka badan ,waxay leedahay 5 cod; halka Dowladdii dadkeedu uu ka badan Todobo Milyan ay leedahay 6 Cod.

### 4.2.5. Awoodaha Sharci-dejineed ee Bundestrat

#### *a) Awoodda Curinta Hindise Sharciyeed*

Waxa uu ka qeyb-qaataa, lana wadaagaa awoodahaas dowladda Federaalka iyo Aqalka Hoose(Bundestag).

Curinta ama soo jeedinta waa in ay ka timaad hal dowlad goboleed ama wax ka badan. Haddii dowalad goboleed doonayso in la soo gudbiyo hindise sharci, waa in ay la saftaan dowlad goboleedkaas. Go’aanka Bundesrat waxa uu noqonayaa mid degreeto ah. haddii soo jeedinta dowlad goboleedkaas ama dowlad-goboleedyadaas uu helo codka aqlaiyadda ee sadex meelood labo, waxa u noqonayaa Hinse. Hindisayaasha dowladda waxaa loo dirayaa Dowladda Federaalka kadibna waxaa loo dirayaa Aqalka Hoose(Bundestag )muddo 6 isbuuc ah gudahood.

***b) Xaqa  wax ka bedelka sharciyada***

Sidaan horay u soo sheegnay aqalkani malahan awood uu si toos ah ugu curiyo hidise ama uu wax ka bedel ugu sameeyo, hase yeeshee wuxuu ldul istaagay hiseyaasha hormo-qoraalka ah loo soo gudbiyay,  waxa uuna leeyahay in uu talo ka bixiyo, ama ansixiyo ama uu diido ama uu dalbado in wadahadal laga galo loona gudbiyo guddiga dhexdhaxaadinta.

Waxa uu leeyahay awood uu ku back-gareeyo ishortaagna ku sameeyo habraaca sharci dejinta, sidaasi darteed Dowladda federaalka iyo Aqalka hoose waxay ku qasban-yihiin in ay tixgeliyaan soo jeedinta wax ka bedelka uu soo bandhigay haddii ay doonayaan in ay meel-mariyaan.

### *c) Habraaca  sharci dejineed ee caadiga ah*

Habraaca sharci dejineed waxa uu ku xiranyahay haddii uu yahay mid ay soo gusbisay dowladda federaalka ama uu soo gudbiyay Bundestag ama Bundesrat., waxa uu noqon karaa hindise la tashi u baahan ama mid la diiday.

i. Soo-bandhgid iyo gudbin.

Mar allaaliyo marki ay dowladda federaalka soo gudbiso hidisayaal, waxa uu leeyahay Bundestratka in uu ra'yiggiisa ka dhiibto ka hor inta aan loo gudbin Bundestag ee uu akhrinta 1aad joogo, waxa uu haystaa muddo 6 isbuuc ah ama seddex ama sagaal xaaladaha in uu ku soo gudbiyo soo jeedinta wax ka bedelka, ku darista iyo bedelidda. Xukuumadda federaalka iyo Bundestag ku khasbana aqrinta 1aad ee Bundestrat, hase yeeshee aqrinta 2aad ayaa muhiin ah, waayoo soo jeedintiisa layskama indha-tiri karo. Kadib dowladda federaalka ayaa ra'yigeeda oo qoraal uga jawaabayso soo jeedimada. qabyo-qoraalkaas, ra'yiga Budesrat iyo qoraalki jawaabta dowladda federaalka ayaa loo gudbinayaa Bundestag.

ii. Codka Bundestag

Xaalad kasta oo ay tahay horma-qoraalka ay soo gudbisay dowaldda federaalka iyo jawaabta ay ka bixisay ra'yiga iyo soo-jeedinta Bundesrat-ka iyo soo-jeedinta Bundesratka waxaa loo gudbinayaa oo u codeynayo aqalka hoose (Bundestag).

iii. Doodaha iyo akhrinta 2aad ee Bundesrat

Akhrinta 2aad kadib, haddii hindisuhu yahay mid la tashi loogu yeelay ama mid la laalay labadaba. Haddii uu la talin-yahay waxa uu yeelay awood wadaag, hindisayaashaasna lama ansixin karo taladiisa la’aanteed.

# 5. NIDAAMKA GARSOOR EE KU HABOON SOOMALAIYA

## 5.1. Hordhac

Soomaaliya waxay ka soo kabanaysaa khilaaf iyo colaado muddo dheer ka jiray kuwaasoo ragaadiyay qaranimadeedii dalka, sidoo kale galaaftay is-aaminaaddii ka dhaxaysay bulshada.

Waxaa burburay wax kasta, waddaniyaddii, dhaqankii, dadnimada, akhlaaqdii, anshixii iyo hidihii soo-jireenka ahaa ee ay ummaddu lahayd.

Ma jiraan ila-dhaqaale oo ku filan isla-markaana kabi-kara dowladnimada curdanka ee dalka ka hana-qaaday, waxay la daalaa-dhacaysaa amni-darri, shaqo la'aan, tayada waxbarashada oo aad hoseeysa, faya-dhowrka bulshada oo aad u liita iyo is-aaminaad la'aan iyo qabyaalad hab-dhaqan u noqotay bulshada oo idil.

Soomaaliya waxay u baahan tahay in ay hesho hannaan cadaaladeed oo haboon, iyadoo maskaxda lagu hayo taariikhda xeereed, iyo xaaladda dhaqan-dhaqaale ee dalka.

Hannaanka waxaa loo door-bidi karaa kuwa ka jira dalal kale oo is-lahaansho la wadaaga Soomaaliya. Waxaa laga yaabaa in aan maskaxda ku hayno hannaan hufan. Si kastaba, waxaa loo baahan yahay in aan xaqiiqada waafaqno

Sidaasi-dareed waxaan cutubkaan ku soo gudbinaynaa nidaamiyada garsoor iyo kan caddaaladeed ee ka jira dunida federaalka.

### 5.2. Nidaamyada garsoorka ee ka jira dunida

Garsoorku waa tiir ka mid ah tiirarka Dowladda, waana mid ka maxabannaan hay’adaha sharci dejinta iyo fulinta. Garsoorka waa ilaaliyaha nidaamka Dolwadda, Dastuurka iyo Shuruucda kale ee Dalka. Wuxuu sidoo kale kafaala-qaadaa xorriyaadka shakhsiga iyo xuquuqda muwaaddinka iyo qofka.Wuxuu xaqiijiyaa dastuuriyadda shuruucda uu dejiyo baarlamaanku.

Haddaba si loo helo nidaam garsoor oo ku haboon dadka iyo dalka, noqdana dhaxal reeb iyo maguurto ay leeyihiin umadda Soomaaliyeed waxaa lama huraan ah in laga baaraan-dago nidaamka garsoor ee loo doorayo umadda iyadoo saldhig iyo tixraac looga dhigayo sooyaalka qaanuuneed, dhaqaale iyo dhaqameed. Marka la hadlayo nidaamka Federaalka waa in Dastuurku si cad u qeexo cidda leh awoodda dejinta xeerarka nidaaminaya Maxkamadaha, Maamulka, Magacaabista Garsoorayaasha, qaab-dhismeedka Garsoorka iyo Heerarka Maxkamadaha. Inta badan Dastuuradu faah-faahin dheeri ah kama bixiyaan heerarka Maxkamadaha, waayoo taasi waxay fududeynaysaa in si sahlan

lagu bedelo nidaamka Garsoorka iyo maxkamadaha iyadoo la eegayo baahida bulshada.

Si arrintaas loo iftiimiyo waa in laga jawaabo su'aalahaan: yaa leh go'aan ka gaarista dacwadaha federaalka? Iyo kuwa Dowlad Goboleedka?  Maxkamaddee go'aan ka gaarayso ma maxkamadaha federaalka? Mise kuwa Dowlad Goboleedk? Imise heer Maxkaamdeed aya jiraya? Maxkamado Darajada Hoose? Maxkamado Racfaan? Maxkamada Gaar ah? Maka hadlay Dastuurku? Mise waxaa lagu soo saarayaa xeerar gaar? Yaa leh awoodda magacaabista, bedelaadda iyo ruqseynta Garsoorayaasha? Yaa dejinaya Nidaamka Garsoor ee Maxkamadaha Federaalka? Yaa dejinayaa nidaadka Garsoor ee Maxkamadaha Dowlad Goboleedka?

Haddaba si loo abaaro jawaabta su'aalahaan waxaa muhiim ah in marka hore la soo bandhigo nidaamyada Garsoor ee Caalamka ka jira, kadibna la taxliiyo si loo bidhaamiyo nidaamka Garsoor ee udub-dhigga u noqon karo Garsoorka Soomaaliya.

Dalkasta wuxuu dhigtaa nidaamka garsoor ee ku haboon dadkiisa waxayna taasi ku xirantahay sida loo dhowro ku dhaqanka nidaamkaas, waxaana saldhig looga dhigaa hadba baahida bulshadaas iyo sida uu u shaqeyn karo iyadoo la eegayo sooyaalka Xeereed, dhaqaale iyo dhaqan ee umaddaas.

Wadamada Federaalka waxaa ku badan isku dhaca iyo khilaafka xeerarka Federaalka iyo kuwa Dowlad Goboleedyada, sidoo kale ikhtisaaska Maxkamadaha, xalinta arrintaasi waxay ku xirantahay hadba nidaamka garsoor ee dalku qaato. Haddaba waxaana halkaan ku soo bandhigaynaa nidaamyada garsoor ee Caalamka ka jiro iyo faa'iido iyo khasaaro waxa ay leeyihiin:

Waxaa jira Sadex nidaam Garsoor oo kala ah:

**b) Nidaamka Baahsan/ama Labada Heer ah(Dual System):**


(eg.USA, Ethopia)

Nidaamka Baahsan ama Labada Heer, waa nidaamka garsoorka dalka u kala qeybinayo laba heer, Heer Dowlad Federaal ah iyo Heer Dowlad Goboleed. Dowladda Federaalka waxay yeelanaysaa nidaam garsoor u gaar ah, sidoo kale Maxkamado Federaal ah oo galaya dacwadaha federaalka ama murannada la xiriiro xeerarka Dowladda Federaalka.waxaa kaloo jiraya Maxkamad Sare oo Federaal ah iyo Maxkamad Dastuuri ah oo gasha dacwadaha ku saabsan dastuuriyadda shuruucda ama go'aanada.

Dowlad Goboleed kasta waxay yeelanaysaa nidaam Garsoor oo gaar u ah, xeerarkiisana ay dejiyaan Sharci dejinta dowlad Goboleedkaas, sidoo kale Maxkamado ikhtisaas u leh dacwadaha ka dhasha xeerarka Sharci dejinta dowlad goboleedka ee ku eg xuduuda uu ku fadhiyo Dowlad-goboleedkaas.

**HEER DOWLAD GOBOLEED**

**HEER FEDERAAL**





**t) Nidaamka Midaysan (Unified System):** (eg. Belgium, Nidaamki Hore ee Soomaaliya)

Nidaamka midaysani waa kan uu dalku yeelanayo hal nidaam Maxkamadeed oo galaya dhammaan dacwadaha Federal iyo kuwa Dowlad Goboleedka. Nidaamka Maxkamadaha midaysan wuxuu qeexayaa in dhammaan maamulka Maxkamadaha ay yeelanayso Dowladda Federaalka, waxay sidoo kale leedahay awoodda magacaabista, shaqo ka-joojinta, eryidda iyo dalacsiiinta

garsoorayaasha iyo shaqaalaha garsoorka. Nidaamkan waxaa jira maxkamada mid ah iyo garsoorayaal mid ah oo go'aan ka gaara dacwadaha Federaaalka iyo kuwa Dowlad Goboleedkaba.

Nidaamka midaysan wuxuu qeexayaa in dhammaan mas'uuliyadda Maxkamadaha ay yeelanayso Dowladda Federaalka Ama ay Dowlad Goboleedku yeelanayso maamulka maxkamadaha ama magacaabista garsoorayaasha iwm balse isla Maxkamadahaas ayaa galaya dacwadaha Federaalka iyo Kuwa Dowlad Goboleedka.




**j) Nidaamka Isku-dhafan(Integrated system)(**Pakistan, India, Tanzania, Canada, India)


Nidaamka isku dhafan ee Maxkamadaha waa kan ay Maxkamaduhu ikhtisaas u leeyihiin dacwadaha federaalka iyo kuwa dowlad


goboleedka, xiitaa maxkamadaha daraja hoose ayaa galaya dacwadaha federaalka. Nidaamkan waxaa ka sii farcama dhowr nidaam oo tilmaamaya in Maxkamadda Sare ee Dowlad Goboleedku ay galayso racfaanada laga soo qaato dacwadaha Dowlad Goboleedka, halka Maxkamadda Sare ee Federaalka ay galayso racfaanka dacwadaha Federaalka oo kaliya. Waxaa kaloo jiro nidaam raacsan kan hore oo isna tilmaamaya in dhammaan dacwadaha federaalka iyo kuwa dowlad goboleedka looga soo qaadan karo racfaan Maxkamadda Sare ee Federaalka (Fiiri India). Hanaanka isku dhafanka oo ay Dowlad Goboleedku maamulayso ilaa Maxkamadda Racfaanka. Ama nidaamka isku dhafan oo ay Maxkamadihiisa maamulayso Dowlad Goboleedku, halka Maxkamadda Sare ee Federaalka ay maamulayso Dowladda Federaalka ama in maamulka maxkamadaha ay yeeshaan dowlad goboleedku, halka ay jirayaan Maxkamado gaar ah  oo galaya dacwadaha federaalka , waxaa sidoo kale jiraya Maxkamadda Sare Federaal ah.

Tusaale ahaan Pakistan waxaa jira Maxkamadda Sare ee Dalka (Supreme Court) oo heer federaal ah, waxay gashaa Racfaanadda laga soo qaato Maxkamadaha Sare ee Dowlad Goboleedka (High Court) iyo Federal Sharia Court, waxay sidoo kale gashaa racfaannada laga soo qaato Maxkamadaha gaarka ah eel ka xiriira ku xadgudubka xuquuqda aasaasiga ah ee dastuuriga ah.

Maxkamadaha Hoose waxaa kor joogtaynaya isla markaana maamulaya Maxkamadda Sare ee Dowlad G/leedka, magacaabista, dalacsiinta iyo xil ka qaadista Garsoorayaasha Maxkamadaha Hoose waxaa leh Guddiga Maxkamadda Sare ee Dowlad G/leedka. Dhammaan Nidaamka Garsoorka Dalka waxaa maamulaya Golaha Sare ee Garsoorka, gabi ahaanba way ka madaxbannaanyihiin heerarka Dowladaha Federaalka iyo Dowlad Goboleedba, waxay sidoo kale u madax bannaanyihiin nidaamkooda maaliyadeed.

**Qaab-Dhismeedka Nidaamka Garsoorka Isku-Dhaf**






Haddaba sidaa sare ku xusnay nidaamka Federaalka waa inuu qeexo nidaamka garsoor ama maxkamadeed ee uu dalku yeelanayo si loo xaqiijiyo hanaan hufan oo shaqeeya go'aanna ka gaaro dacwaha la xiriiro shuurcda Federaalka iyo kuwa Dowlad Goboleedka. Nidaamka baahsan (Separated system) ee looga dhaqmo Maraykan wuxuu dhigayaa laba heer maxkamadeed, heer federal iyo heer dowlad goboleed, waana nidaamka uu tilmaamayo Dastuurka Ku Meel Gaarka ah, nidaamkaasi wuxuu si cad u qeexayaa in ay jirayaan Maxkamado kala soocan oo kala ah Maxkamad Sare, Maxkamad Racfaan iyo Maxkamadaha Hoose. Sida aan sheegnay Federaalku wuxuu yeelanayaa Maxkamad Sare ee Federaalka, Maxkamado Racfaan oo Heer Federaal iyo Maxkamado

Hoose oo Heer federal ah; halka Dowlad Goboleed kastaahi yeelanayso Maxkamad Sare heer dowlad-goboleed, Maxkamad racfaan heer-dowlad goboleed iyo Maxkamado Hoose oo heer dowlad goboleed ah.

Dhanka kale nidaamka midaysan waa kan ay maxkamaduhu mid yihiin, nidaamka maxkamadeedna uu yahay mid midaysan, maamulkoodana ay leedahay dowladda Federaalka.

Halka nidaanka isku dhafan ay jirayaan Maxkamado ikhtisaas u leh dacwadaha federaalka iyo kuwa dowlad goboleedka labadaba, laakiin ay maamulka yeelanayaan dowlad goboleedku, sidoo kale ay jiri karaan Maxkamad Racfaan oo laba heer ah iyo Maxkamado Sare oo labo heer ah, waxaa sidoo kale maamulka maxkamadaha kala yeelanayo dowladda dhexe iyo dowlad goboleedka.

## 5.3. Xalinta khilaafka iyo isqabqabsiga ka dhasha nidaamka federaalka

Maadaama Dastuurka Dalku u qeybiyay qaab-dhismeedki Dowladda Heer Dowladda Federaal iyo Heer-Dowlad Goboleedka, waxaa hubaal ah in uu jirayo tartan u dhexeeya heerarka kala duwan ee Dolwadaha, sidoo kale inuu jirayo khilaaf ku saabsan awoodaha Dastuuriga ah ee Dowladahaas labada heer ah. Haddaba kala aragti duwanaashiyaha ka dhshay arrintaas ee ku saabsan awoodaha Dastuuriga ee Heerarka Dowladeed, waxaa ka imaanaya khilaaf ay

khasab tahay in loo helo xal, ayna jirto Maxkamad Dastuur oo fasirto murannada ku saabsan dastuuriyada sharciga iyo cabashooyimka la xiriira.

Wadamo badan oo Federaal ah waxay dastuuradooda si cad ugu qeexaan cidda xalinaysaa is-qabadka iyo muranka ka dhasha Xeerarka Federaalka iyo Xeerarka Dowlad Goboleedka, waxayna si cad u qeexaan in la raacayo Xeerka Federaalka ah.

Waa in ay jirto Maxkamad Sare oo gao'aan ka gaarta dacwadaha la xiriiro dastuuriyadda sharciga, waana in ay ahaato Maxkamadda ugu saraysa dalka.

Waxaa jira laba nuuc oo Maxkamadeed oo go'aan kama dambays ah ka gaaro dastuurinimada sharciga iyo fasiraadda qodobada dastuurka, waxayna kala yihiin Maxkamadda Sare ee Dalka (Supreme Court) iyo Maxkamadda Dastuurka (Constitutional Court).

Wadamada Federaalka qaarkood waxay leeyihiin Maxkamadda Sare oo ah tan ugu sarrayso dalka, iyada ayaana gasho dacwadaha la xiriiro fasiraadda shuruucda iyo dastuurnimada, sida USA, Canada, Australia, Pakistan, India, Malaysia, Nigeria, Argentina, Brazil, Mexico, Iyo Venezuela.

Waxaa jira wadamo kale oo leh Maxkamad Dastuur oo gasha dacwadaha la xiriiro arrimaha dastuurka, wadamadaas waxaa

kamdi ah: Germinay, Austria, Rusia, Bosnia and Herzegovine, the United Arab Imirates, Belgium, Urdun, South Africa,  iyo Spain.

## 6. NIDAAMKA AWOOD-WADAAGGA

Sida uu dastuurka kumeelgaarka ah u qeybinayo awoodaha Masuuliyadaha ay kala leeyihiin dowladda federalka iyo maamul goboleedyada oo aan kala caddeyn waxa ka dhashay hardan awoodeed oo soo noqnoqday ee u dhexeeya labada heer ee dowladeed.

Mugdiga dastuurka ee awood qeybsiga waa mid isugu jirta gaabis iyo kala caddeyn la'aan si toos ah u abuuray khilaafka.

Qodobka 54-aad ee dastuurka kumeelgaarka ah waxa uu afar awoodood si gaar ah u siinayaa dowladda federaalka kuwaasoo kala ah: (1) arrimaha dibadda, (2) difaaca qaranka, (3) jinsiyadda iyo socdaalka, iyo (4) siyaasadda lacagta. Isla qodobkan ayaa sheegaya in awood qeybsiga siyaasadeed iyo dhaqaale in mustaqbalka ay ka wada xaajoon doonaan maamul goboleedyada iyo dowladda federaalka.

Isla qodobkan ayaa sheegaya in awood qeybsiga siyaasadeed iyo dhaqaale in mustaqbalka ay ka wada xaajoon doonaan maamul goboleedyada iyo dowladda federaalka. Qodobka 53 (1) ayaa sii jahwareerinaya xaaladda waxana uu sheegayaa in maamul goboleedyada lagala tashado kaalmada dibedda, ganacsiga, cahdiyada ama arrimaha kale ee la xiriira heshiisyada caalamiga ah.

Marka lagasoo tago qodobadan iska hor imaanaya, qodobka 52-aad ee dastuurka kumeelgaarka ah ayaa ilaa 10 awoodood sheegaya in ay wadaagaan dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada. Masuuliyadahan waxa ay kala yihiin (1) ilaha biyaha, (2) beeraha, (3) xannaanada xoolaha, (4) daaqa iyo seeraynta, (5) la dagaallanka nabaadguurka iyo ilaalinta deegaanka, (6)caafimaadka, (7) tacliinta, (8) xiriirinta iyo wadaxaajoodka hoggamiyeyaal-dhaqameedka, ilaalinta iyo horumarinta xeer-dhaqameedka, (9) xiriirinta culimada diinta, iyo (10) dhallinyarada. Qodobkan waxa uu leeyahay 10-kan awoodood waxa ay u baahan yihiin 'xiriir iskaashi' u dhexeeya dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada.

Dastuurrada federaalka ah waxa ay awoodahan intooda badan u yaqaannaan 'awoodo wadaag ah'. Marka lagasoo tago qodobadan kooban, ma jiro hannaan kale ee uu dastuurku ku qeexayo qeybinta awoodaha.

## 6.1. Aragtida Guud ee Awood Wadaagga

Waxaa awoodaha loo wadaagi karaa saddex heer oo kala ah:

a)Awoodaha Federaalka: wuxuu khuseeyaa Qaranka oo dhan;

b)Awoodaha Dowlad Goboleedyada: wuxuu khuseeyaa fulintaadeegyada asaasiga ah ee bulshada.Awoodaha la wadaago: wuxuu khuseeyaa fulinta mas'uuliyadaha ama xilalka leysla qabanaayo laakin baaxadda ay ku kala duwan yihiin; c) woodaha

aan la asteyn: Awoodaha, mas'uuliyadaha ama xilalka aan lagu asteyn dastuurka ama shuruuc kale, waa mas'uuliyadda Dowladda Federaalka, haseyeeshee u igman karto Dowlad Goboleedyada.

## 6.2. Mabaadi'da ay ku saleysan tahay qeybinta awoodaha iyo mas'uuliyadaha

Nidaamyada qeybinta mas'uuliyadaha iyo baahinta adeegyada aad ayay u kala duwan yihiin. Nidaamyadaa kala duwan, ma jiro hab ka wanaagsan kuwa kale, ma jiro qaab la dhahi karo midka ayaa ugu habboon. Xaaladaha iyo duruufaha dalba dalka kale wax buu kaga duwan yahay laakin waxaa jira mabaadii' guud oo la raaco, kuwaa oo hagaya nidaamka federaalka, waxaana kamid ah:

1) Muwaadin walba meel kasta uu ka joogo dalka inuu helo adeegyo iyo waxqabad xukuumadeed oo isku mid ah.
2) Inuu jiro xiriirro iskaashi iyo istaageerid labo-dhinacle ah oo ka dhexeeya Dowladda Fededraalka, Dowladaha xubnaha ka ah federaalka iyo dhexdooda.
3) Mas'uuliyadda fulinta adeegyada waa in loo dhiibaa hadba heer xukuumadeedka awood ku filan u leh, sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta, uguna dhow muwaadinka adeega loo qabanaayo - "subsidiarity principle". Tusaale ahaan, degaanka ka faa'ideysanaya (benefit area) adeegyada nadaafadda bulshada degaankaas, laakin maamulka hawada waa adeeg daboolaya geyiga qaranka.

4) Awood qeybsiga nidaamka Federaalka JFS wuxuu ku slaeysan yahay nidaamka Federaalka Maamuleed (Administrative Federalism).
5) Guud ahaan, mas'uuliyadaha loo asteynayo heer qaran waxay la xiriiraan arrimaha dejinta sharciyada iyo siyaadaha, dejinta halbeegyada iyo bixinta adeegyada guud sida amniga qaranka iyo siyaasadda guud dhaqaalaha qaranka.
6) Mas'uuliyadaha dowlad-goboleedyada wuxuu gaar ahaan diiradda saarayaa dhaqan gelinta siyaasadaha iyo bixinta adeegyada heer deegaan hoosaad, sida daryeelka koowaad ee caafimaadka, shatiyada ganacsiga, fayadhowrka iwm. Dowlad Goboleedyada waxay dejin karaan siyaasado iyo xeerar u gaar ah laakin aan ka hor imaaneyn sharciyada Federaalka.

### 6.3. Arrimaha tixgalinta u baahan:

1) Qiyamka, baahida iyo rabitaanka muwaadiniinta.
2) Heerka dowladeed ee leh awood ku filan qabashada adeegga loo baahan yahay.
3) Caqabadaha dowladdu ay wajahayso si ay u meel mariso ajendayaasha qaranka.
4) Sare u qaadista ka qaybgalka muwaadiniinta, isla-xisaabtanka, iwm.

5) Kala horeyn siinta deedejinta awoodaha.

**6.4 Qeexidda sida awoodaha/xilalka loo kala leeyahay:**

Asbaabaha loo kala saarayo mas'uuliyadda waxay muhim u yihiin:

- Mas'uuliyadaha way kala cad yihiin. Waxay suurta gelineysaa isla xisaabtanka iyo daba-galka qolada mas'uulka ka ah fulinta xilalka;
- Xil fulinta iyo kharashka ku baxaayo way isku xiran yihiin. Kharashka fulinta waxaa la ogaan karaa keliya markay baaxaddu caddahay;
- Howlaha waxaa fulinaayo hadba heerka awood ku filan u leh, uguna dhow mawaadinka adeega loo qabanaayo - "subsidiarity principle".
- Haddii aan awoodaha la kala qeexin waxay ka dhalan kara xiriirka heerarka dowldaha xasillooni darro iyo adeegis xumo "haddii qof walba mas'uul yahay, qofna mas'uul ma ahan".

## 6.4. Noocyada Wadaagga Mas'uuliyadaha

- Kuwa Kala Gaarka ah: Mas'uuliyadaha ama xilalka u kala saaran heerarka dowladaha
- Kuwa Leysla Leeyahay: Mas'uuliyadaha ama xilalka leysla qabanaayo laakin baaxadda ku kala duwan yihiin.
- Kuwa aan la Asteyn: Mas'uuliyadaha ama xilalka aan lagu asteyn dastuurka ama shuruuc kale, waxaa qaban karta heer kasta. Laakin waa in lagu cadeeyaa dastuurka.

## 6.5. Waa maxay caam ahaan awoodaha iyo shaqooyinka ay dowladi fuliso?

- Dowlad dhexe
- Dowlad awoodda daadajisa iyo
- Dowlad Federaal ah
- Noocyada kor ku xusan guud ahaan waxa ay ka siman yihiin in ay fuliyaan adeegyo iyo waajibaadyo isku mid ah, hase yeeshee waxa ay ku kala duwan yihiin heerarka kala duwan ee heerka dowladeed ee shaqada fulinaysa, waana sidaan hoos ku xusan:

## 6.6. Awoodaha iyo shaqooyinka caamka ah ee ay dowladqabato

# AWOODAHA IYO SHAQOOYINKA CAAMKA AH EE AY DOWLADI QABATO

| | |
|---|---|
| 1 | Siyaasadda Lacagta |
| 2. | Difaaca |
| 3. | Arrimaha Dibadda |
| 4. | Socdaalka iyo Jinsiyadda |
| 5. | Ganacsiga |
| 6. | Kaabayaasha Dhaqaalaha waaweyn |
| 7. | Waxbarashada |
| 8. | Biyaha/Korontada |
| 9. | Xanaanada Xoolaha |
| 10. | Caafimaadka |
| 11. | Beeraha/Daaqa iyo Seeraynta |
| 12. | Bii'adda |
| 13. | Diinta iyo Awqaafta |

| | |
|---|---|
| 14. | Boostada iyo Isgaariinta |
| 15. | Dekadda iyo Gaadiidka Badda |
| 16. | Shaqada & Arrimaha Bulshada:Caymiska dakhliga & Howlgab |
| 17. | Kheyraadka macdanta/Batroolka |
| 18. | Arrimaha dowlad hoose |
| 19. | Nidaamaka Maxkamadaha/Sharciga ciqaabta |
| 20. | Aminaga /booliska |
| 21. | Canshuuraha shirkafdaha iyo dakhliga qofka/ Canshuuraha/ macaashka |
| 22 | Dhalinyarada & Ciyaaraha |
| 23 | Kaluumaysiga |
| 24 | Duulista & Gaadiidka |

**Dastuurka KMG ah muxuu awoodaha ka leeyahay?**

Sida ku xusan qodobka 54 aad ee Dastuurka KMG, wuxuu qeexayaa in ay si gaar ah u maamusho Dowladda Federaalka ah awoodaha: Lacagta, Difaaca, Arrimaha Dibadda/Heshiisyo caalami ah iyo Socdaalka iyo Jinsiyadda.

| |
|---|
| **Siyaasadda Lacagta** |
| **Difaaca AWOODAHA** |
| **Arrimaha Dibadda /Heshiisyo caalami ah** |
| **Socdaalka iyo Jinsiyadda** |
| **Ganacsiga dibadda** |
| **Ganacsiga udhaxeeyo gobollada gudahooda** |
| **Kaabayaasha Dhaqaalaha waaweyn** |
| **Waxbarashada** |
| **Biyaha** |
| **Xanaanada Xoolaha** |
| **Caafimaadka** |
| **Beeraha** |
| **Bii’adda** |
| **Daaqa iyo Seeraynta** |
| **Caymiska dakhliga** |
| **Howlgab** |

| |
|---|
| **Kheyraadka macdanta** |
| **Arrimaha dowlad hoose** |
| **Nidaamaka Maxkamadaha** |
| **Sharciga ciqaabta** |
| **Aminga /booliska** |
| **Canshuuraha/ macaashka** |
| **Canshuuraha shirkafdaha iyo dakhliga qofka** |

### Qod. 52 aad ee Dastuurka KMG

1. Xukuumadda Federaalka ah iyo Xukuumadah xubnaha ka ah waxaa waajib ku ah in madaxweyneyaasha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Mas'uuliyiintooda sare yeeshaan kulammo joogto ama kaltan ay kaga wada xaajoodaan arrimaha degaammadooda wada saameeya oo ay ka mid yihiin:

- Caafimaadka;
- Ilaha biyaha;
- Beeraha;
- Xannaanada xoolaha;
- Daaqa iyo seeraynta;
- La dagaallanka nabaadguurka iyo ilaalinta deegaanka;
- Tacliinta;
- Xiriirinta iyo wada-xaajoodka hoggamiyeyaal-dhaqameedka, ilaalinta iyo horumarinta xeer dhaqameedka;

- Xiriirinta culimada diinta; iyo
- Dhallinyarada.
- Tacliinta;
- Xiriirinta iyo wada-xaajoodka hoggamiyeyaal-dhaqameedka, ilaalinta iyo horumarinta xeer dhaqameedka;
- Xiriirinta culimada diinta; iyo
- Dhallinyarada.

2. Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalkayadu dhexdooda ama Xukuumadda Federaalka waxay isla geli karaan heshiisyo iskaashi oo ay ku wada hawlgalaan, aanse lahayn awood sharci, kana horimanayn Dastuurka Federaalka iyo kan Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka.

## 6.7. Mowduucyo Kala duwan

### 6.7.1. Adeegyada Bulshada sida:

- ✓ Caafimaadka.
- ✓ Waxbarasho iwm

Hirgalinta iyo fulinta adeegyada sare ku xusan waxaa siwadajir ah uga qayb qaadanaya labada heer ee dowladda. Dowladda Federaalka waxay mas'uul ka tahay sharci dejinta iyo hagidda siyaasadda warbarashada iyo caafimaadka dalka. Waxaa jira awoodo ay wadaagaan labada heer ee dowladda loona

baahanyahay in ay u fuliyaan si wadajir ah si loo hormariyo adeegyada aasaasiga ah ee arrimaha bulshada.

### 6.7.2. Kaabayaasha dhaqaalaha ee leh qayb arrimo dibadeed

- Duulista
- Dakadaha
- Isgaarsiinta iyo boostada

Awoodaha maamulka iyo dejinta siyaasadda ee kaabayaasha dhaqaalaha ee leh qeyb arrima dabadeed, waxay gaar u yihiin dowladda federaalka, sida uu qeexayo qodobka 54aad ee Dastuurka KMG ah. Sidoo kale ururinta dakhliga kaabayaasha dhaqaalaha waxaa mas'uul ka ah dowladda federaalka, ayadoo kaashanaysa dowlad goboleedyada.

### 6.7.3. Kaabayaasha dhaqaale ee lafdhabarta u ah

- ✓ Kaluumeysiga;
- ✓ Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;
- ✓ Beeraha iyo Waraabka

Kheyraadka dabiiciga ah ee dalka oo ah kaabayaasha dhaqaale ee lafdhabarka u ah dhaqaalaha dalka kuna tiirsan yihiin bulshada soomaaliyeed, waxa si siman u maamulaya, fulinaya mas'uulna ka ah labada heer ee dowladda (dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada).

**TIXRAACYADA**


1. Mohamed Trunji, Somalia: The Untold History 1941 – 1969, Leicester: Lohpressn 2015.
2. Hababka Baahint Maamulka Soomaaliya. Afyare Cabdi Cilmi; Machadka Heritage ee daraasaadka siyaasadd, 2014.
3. Adam, H. (1994). "Somalia: Federalism and Self- Determination." In Conflict and Peace in the Horn ofAfrica.
4. Federalism and Its Alternatives, ed. P. Woodwardand M. Forsyth. Aldershot: Dartmouth.Andewag, R. B. (2000).
5. "Consociational Democracy." Annual Review of Political Science 3:509-536. Cabral, L. (2011).
6. Decentralization in Africa: Scope, Motivations and Impact on Service Delivery and Poverty. Working Paper 020. Brighton, Sussex: Overseas Development Institute. Cheema, G. S. & Rondinelli, D. A. eds. (2007).
7. Decentralizing Governance: Emerging Concepts and Practices. Washington, DC: Brookings Institute.Dowden, Richard. (2011).
8. "Don't force statehood on Somalia." African Arguments. http://africanarguments.org/2011/10/20/don't-forcestatehood- on-somalia-by-richard-dowden/ (accessed January 26, 2014).

9. Elazar, Daniel J. (1994). Federal systems of the world a handbook of federal, confederal and autonomy arrangements. London: Longman Current Affairs.Eno, M. A. & Eno, O. A. (2009). .
10. http://www.heritageinstitute.org/wp-content/uploads/2017/02/Baarlamaanka-Soomaaliya-hasoo-saaro-dastuur-ka-yimid-una-adeega-shacabka.pdf.
11. Intellectualism amid ethnocentrism: Mukhtar and the 4.5 factor." Bildhaan 9:137-145.Golove, D. M. (2003).
12. The new confederalism: treaty delegations of legislative, executive, and judicial uthority." Stanford Law Review 55(5):1697-1748. Hersi, A. (2004).
13. Baarlamaanka Soomaaliya ha soo saaro dastuur ka yimid una adeego bulshada, Mahcadka Heritage ee daraasaadka siyaasadda 2017.
14. Democratic Devolution of Powers in Somalia: Administrative Decentralization or Federalism for Self-Destruction." Accessed 25 January 2014 .http://www.somaliaonline.com/community/showthread.php/37273-Administrative-Decentralization-or-Federalismfor-Self-Destruction Hussein, A. (2011).
15. http://www.heritageinstitute.org/wp-content/ uploads /2013 /12/ HIPS_Policy_Brief_006-2013_ENGLISH-1.pdf

16. “The Future Constitutional Structure of the Somali Republic: Federal or Decentralized Unitary State?” Accessed 25 January 2014. http://www.hiiraan.com/op2/2011/apr/ the_future_constitutional_structure_of_the_somali_republic_federal _or_decentralized_unitary_state.aspx Lewis, I.M. & Mayall, J. (1995).

17. A Menu of Options: A Study of Decentralised Political Structures for Somalia. London School of Economics/EC Somalia Unit.

18. Lijphart, A. (1977). Democracy in Plural Societies: Comparative Explanation. New Haven: Yale UniversityPress.

19. Watts, R. (1996). Comparing Federal Systems in the 1990s. Kingston, Ontario: Institute of Intergovernmental Relations, Queens University Press. Wheare, K. C. (1964). Federal Government. Oxford: Oxford University Press.

20. Waldo, M. (2010). “Federalism in Somalia: Birth of Puntland State and the Lessons Learned.” Accessed 25 January 2014. http://horseedmedia.net/2010/10/09/ federalism-somalia-birth-puntland-state-lessonslearned.

21. Schuk, P. H. (2006). "Federalism.” Faculty Scholarship Series. Paper 1672. New Haven, CT: Yale Law School Faculty Scholarship.

22. Samatar, A. (2007). ‘The Porcupine Dilemma: Governance and Transition in Somalia.’ Bildhaan, 7:39-90.

23. Rondelli, D. (1980). ‘Government Decentralization in Comparative Perspective: Theory and Practice in Developing Countries,’ International Review of Administrative Science.

24. Rodden, J. (2004). ‘Comparative Federalism and Decentralization: On Meanings and Measurement.’ Comparative Politics 36(4):481-500.

25. Riker, W. H. (1964). Federalism: Origin and operation significance. Boston: Little, Brown and Company.

26. Parker, A. (1995). Decentralization: The Way Forward for Rural Development? Policy Research Working Paper 1475. Washington, DC: World Bank.

27. Mukhtar, M. (1989). “The Emergence and Role of Political Parties in the Inter-River Region of Somalia from 1947 to 1960.” Ufahamu 17(2):157-163.

28. Mukhtar, M. (2007). “Somali Reconciliation Conferences: The Unbeaten Track.” In Somalia at the Crossroads: Challenges and Perspectives in Reconstituting a Failed State, ed. A. A. Osman & I. K. Souaré. London: Adonis & Abbey Publishers.

29. Lister, F. L. (1996). European Union, the United Nations, and the Revival of Confederal Governance. Westport. CT: Greenwood Press.

http://somalipublicagenda.org/wp-content /uploads /2019/06 /SPA_
Governance _ Briefs_03_2019_SOMALI-1.pdf.

31. The provisional Constitution of Federal Republic of Somalia.

32. Dastuurkii 1960.

33. Dastuurkii 1979.

34. Dastuurkii 1990.

35. Axdigii KMG ee Carta 2000.

36. AXDIGII KMG ee Embegaati 2004.